Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

BUUGA

FADLIGA

BISHA

RAMADAAN

QORAA CABDICASIIS XASAN AADAN GABYAAYE CG

FACEBOOK: CABDICASIIS GABYAAYE CG

EMAIL: abdiasishassan42@gmail.com

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

KALMADA QORAAGA.

Alx alle SW ayey mahad oo dhan u sugnaatey kaasoo ii suura geliyey inaan dhameeye qoraalka dhiganahaygii ugu horeeyey, marka labaad waxaan u mahad celinayaa labadayda waalid oo mudo badan igu soo tabcayey si aan heer wanaagsan oo aaakhiro iyo aduunba I anfaca ay ii baraan, waxaan kaloo u mahad celinayaa macalimiinteyda intaas oo sano wax isoo bareysey oonan la aantood aqoon faaiideen.

Aniga oo magacaygu yahay Cabdicasiis Xasan Aadam Gabyaaye, ahna qoraaga buuga waxaan si sharaf leh uga codsanayaa cid kastoo akhrisata buugan in wixii talo, tusaale, dhaliil iyo cabasho ahba iigu soo gudbin karaan emailka ku qoran buuga xagiisa hore ama ciwaankeyga barta facebook, wixii aan qaldo waa ani iyo shweydaan alle iyo rasuulkiisuba beri ayey ka yihiin.

MAHADNAQ.

NASHQADA JALDIGA BUUGA DAAUUD MAXAMED XASAN CALI.

TAFATIRKA BUUGA QORAA AMUUN XASAN AADAM

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

HORDHAC.

Alxamdulilaah illaahey SW ayey mahadoo dhan u sugnaatey, alle SW ayaanu ugu mahad celineynaa nicmooyinkiisa faraha badan ee uu ku maneystey khalqigiisa, ilaahey ayeynu uga mahad celineynaa inuu inaga dhigey umad islaam ah, alle SW ayeynu uga mahad celineynaa in uu inoo soo direy RASUULKIISA MUXAMED NNKHH kaasoo ina soo gaadhsiiyey diinteena suuban, waxeynu nahay umadii ugu fadliga badney siduu illaahey SW quraankiisa inoogu sheegey, suurada aala cimraan aayada 101 ee tafsiirkeedu yahay , waxaad tihiin umada u kheyroon ee loosoo bixiyo dadka, waxaad fartaan wanaaga waxaad reebtaan xumaanta waxaanad rumeysaan eebe.

Dhiganahan la magac baxey fadliga bisha ramadaan, wuxuu wax badan u tari doonaa dadka soomaaliyeed ee ay ku adkaatey luuqada carabigu oo ah luuqada saxda ah ee ay ku qoran tahay diinteena suuban ee islamka, taasoo ay ka faaiideysan karaan khaasatan inta la xidhiidha bisha barakeysan ee ramadaan iyada oo aan ku qorey luuqadeena afka hooyo fadliga bishan.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

TUSMADA BUUGA.

Contents

1. BISHA RAMADAAN.....8

FADLIGA BISHA RAMADAAN.....8

DHACDOOYINKII DHACEY BISHA RAMADAAN.....10

2. SOONKA BISHA RAMADAANKA 13

MACNAHA SOONKA 13

XUKUNKA SOONKA.....14

SOONKA IYO ABAAL MARINTIISA 19

SOONKU CIDUU KU WAAJIBEY.....21

SOONKU CIDAANU KU WAAJIBIN 21

XIKMADA IYO FAIIDOOYINKA KU JIRA SOONKA.....23

WAXYAABAHA BANAAN SOONKA DHEXDIISA 25

AADAABTA SOONKA.....26

WAXYAABAHA QOFKA MUSLIMKA AH SOONKA KA JEBIYA.....27

SUAAL MUHIIMA U AH SOONKA.....28

SOONKA AAN BANAANEYN.....28

SOONKA SUNNAHA AH 31

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

SOONKA SHUWAALKA.....31
3.SALAADA IYO RAMADAAN.....33
SALAADA TARAAWIIXDA:-.....33
FADLIGA SALAADA TARAAWIIXDA:-.....34
WAKHTIGA SALAADA TARAAWIIXDA:-.....35
TIRADA SALAADA TARAAWIIXDA:-.....35
4. QURAANKA IYO RAMADAANTA:-.....37
RAADEYNTA UU QURAANKU KU YEESHO QALBIYADA:-.....38
QURAANKA OO LA KHATIMO BISHA RAMADAAN.....41
HABEENKII OO QURAANKA LA AKHRIYO.....43
5. SADAQADA IYO RAMADAAN.....44
6. DUCADA IYO RAMADAANTA:-.....46
AHMIYADA DUCADA BISHA RAMADAAN.....47
DUCADA LA AQBALLEY.....47
7. ICTIKAAFKA IYO RAMADAANTA.....49
WAKHTIGA ICTIKAAFKA.....50
WAKHTIGA ICTIKAAFKA RAMADAANTA.....50
SHURUUDAHA LAGA RABO ICTIKAAFAHA.....50
SHURUUDAHA LAGU GALO ICTIKAAFKA.....51
AADAABTA ICTIKAAFKA.....51

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

MAXAA U BANAAN ICTIKAAFAHA 52

MAXAA U BURIYA ICTIKAAFKA 52

8. LEYLATUL QADRI IYO RAMADAANTA.....53

CALAAMADAHA LAGU GARTO LEYLATUL QADRIGA.....53

SHARAFTA HABEENKAN LEYLATUL QADRIGA.....54

HABEENADA UU KU JIRO LEYLATUL QADRIGU 56

DUCADA LEYLATUL QADRIGA 57

9. SEKAATUL FIDRI IYO RAMADAANTA.....58

YAA LAGA RABAA SEKADA 58

WAKHTIGEE WAAJIB TAHAY EE LA BIXIYAA SEKADA 60

MAXAA LA BIXIYAA SAKADA 60

QOFKU YUU KA BIXINAYAA SEKADA 61

LACAG MALAGU BIXIN KARAA SEKADA 61

XILIGEE UGU FADLI BADAN TAHAY IN LA BIXIYO SEKADA 62

10. CIIDA RAMAADANTA 63

SALAADA CIIDA.....64

TIRADA SALAADA CIIDA.....64

TAKBIIRTA SALAADA CIIDA 65

IYADA OO LASOOMAN YAHAY HADII LA OGAADO INEY CIID TAHAY...65

11. FADLIGA MAALINTA CARAFA.....66

12. FADLIGA IN DADKA KHEYRKA LOOGU YEEDHO:.....68

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

13. NIMCADA ALLE & MAHAD-NAQIISA……..……..……70

GABOGABADA BUUGA FADLIGA BISHA RAMADAAN……..…77

TALO DHIIRIGELINEED…….……71

1. BISHA RAMADAAN.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Bisha ramadaan waa bil kamida bilaha, taasoo ilaahey doortey in adoomadiisu ay soomaan oo ku faral yeelay, bishan waxey waxey wada kheyr aad u fadli badan oo illaahey ku gaar yeelley, taasoo ay lagama maarmaan tahay in laga faaiideysto kheyrkeeda.

FADLIGA BISHA RAMADAAN.

Bisha Ramadaan waxay leedahay Fadli badan oo Ilaahay ku gaar yeelay, Fadligaa waxa ka mid ah:-

1. **In ilaahay SW Qur'aanka soo dejiyey Bisha Ramadaan, Gaar ahaan habeenka Laylatul Qadriga sida aaydaha ku jira suuratul Dukhaan tilmaamayaan " Waxa uu Rabbi yidhi "Waxaan soo dejiney (quraanka) Haben barakaysan,(laylatul Qadriga)."**

2. **In marka bisha Ramadaan bilaabanto la furo Albaabada Janada, la xidho**

Albaabada Naarta, Shaydaanada waaweyna la xidh xidho sidaa waxa tilmaamay

Nebigeena NNKH isagoo yidhi: "Marka Ramadaanku yimaado waxa la furaa Albaabada janada, waxa la xidhaa Albaabada naarta, Shaydaanada waa la xidhxidhaa". Waxa weriyey Bukhaari iyo muslim.

FAA'IIDADA XADIISKA.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

*** Fadliga Ramadaanka iyo qiimahiisa oo xadiisku sheegay.**

*** In marka Ramadaan soo galo la furo Albaabada janada taas oo macnaheedu yahay khayrka janada lagu gelayo oo badanaya.**

*** In la xidho albaabada Naarta taas oo macnaheedu yahay in camalka naarta lagu galaa yaraanayo.**

*** In la xidhxidho shaydaanada, shaydaanku bisha ramdaan sidii uu muslimiinta ugu awooda badnaa uguma awood badna, kiisa waaweyn ee dunuubta dadka ku ridana waa la xidhaa oo shar kuma ridi karo, Riwaayadaha qaar waxay sheegeen in shaydaanka kiisa madaxa adag la xidhxidho, taas oo laga fahmi karo in aan dhamaan shaydaanku xidhxidhnayn ee kiisa yaryari fasaxna yahay.**

3. In ilaahay u denbi dhaafo qofka sooma bisha isagoo rumaysan, ilaahayna ajri kaga doonaya, Sidaa waxa inoo sheegay Nebigeena NNKH wuxu yidhi: " Qofkii sooma Ramadaanka isagoo rumaysan ilaahayna ajri kaga doonaya waxa loo dhaafaa denbigiisii hore." Waxa weriyey Bukhaari iyo muslim.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

FAA'IIDADA XADIISKA.

 # Xadiisku wuxuu inoo sheegay in laba shardi qofkii laga helo soonkiisa in loo denbi dhaafayo.

1. Qofkii sooma isagoo rumaysan waajibnimada soonka iyo in ilaahay faral kaga dhigay gudashadiisa.

2. In qofku Ajrina kaga doonayo ilaahay oo aanu soonku culays iyo dhib ku ahayn ee ku farxsan xukunka alle, In loo dhaafo denbigiisii tegey oo ah denbigii yaryaraa ah , denbiga waaweyn wuxu u baahan yahay toobad keen .

 # In ilaahay si gaar ah uga sheegtay Soonka Camaladii kale ee la qabanayey, mushqaayada <abaal marintiisa> soonkana uu yidhi anigaa bixinaya.

DHACDOOYINKII DHACEY BISHA RAMADAAN.

Dhacdooyinka taariikhiga ah ee dhex dhacay bishan barakaysan ee ramadaan way fara badan yihiin, waxaana kamid ah kuwan hoos ku xusan:

1. Sidaan wada ognahay bisha ramadaan dhexdeeda waa bishii nabigeenna (s.c.w) Waxyiga ku billowday.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

2. Sidoo kale ramadaanka dhexdiisa sanadkii 10aad ee bicthada nabigeenna (s.c.w) ayuu dhintay Abii dhaalib oo ahaa nabiga (s.c.w) adeerkii, wax bandanna ka difaaci jirey hagardaamadii ree qureesheed ay nabiga ku hayeen.

3.Ramadaanka dhexdiisa sanadkii 8aad ee soo saariddii nabiga ayaa la oofsaday nabiga xaaskiisii ugu horraysay ee uu sida aadka ah u jeclaa, ahaydna ruuxii koowaad ee rumeeyo dhambaalkii uu nabiga siday, waa hooyadii mu'miniinta khadiija bintu khuwaylad.

4. Ramadaanka dhexdiisa Sanadkii 1aad ee hijrada waxaa la sharciyeeyay Aadaanka, kadib markuu riyo ku arkay Cabdullaahi binu zayd.

5. Ramadaanka dhexdiisa sanadkii 2aad ee hijrada ayaa la jideeyay salaadda ciidda.

6. Ramadaanka dhexdiisa sanadkii 2aad ee hijrda waxaa la sharciyeeyay Zakaatul fidriga.

7. Bishan ramadaan dhexdeeda isla sanadkii 2aad ee hijrada ayeey ahayd markii uu Allaah guusha siiyay rasuulka iyo asxaabta dagaalkii lamagac baxay dagaalkii Badar.

8. Ramadaanka dhexdiisa sanadkii 8aad ee hijrada wuxuu Allaah gacanta muslimiinta soo galiyay oo la furtay magaalada barakaysan, ahna qiblada muslimiinta ee Makkah al-mukarramah markaa ayeey dadkii diinta usoo galeen kooxo-kooxo.

9. Ramadaanka dhexdiisa sanakii 11aad ee hijrada waxaa la oofsaday gabadhii rasuulka ee Faadimah bintu rasuuli LLAAH.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

10. Ramadaanka dhexdiisa sanadkii 40aad ee hijrada waxaa shihiiday khaliifkii afaraad ee muslimiinta Cali biu abii-daalib.

11. Ramadaanka dhexdiisa sanadkii 58aad ee hijrada waxaa la oofsaday hooyadii mu'miniinta ee ahayd xaaska kaliya ee uu rasuulka (s.c.w) iyadoo gabadh ah guursaday, si aad ahna uu u jeclaa waa Caaisha binti abii-bakar.

12. Ramadaanka dhexdiisa ayeey ahayd sanadkii 92aad ee hijrada markii ay muslimiinta furteen اندلس (spain) wuxuuna ALLAAH ku furay gacanta Daariq binu ziyaad.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

2. SOONKA BISHA RAMADAANKA.

- Soonku wuxuu ka mid yahay Arkaanta islaamku ku taagan yahay ee shanta ah , Rasuulku wuxu yidhi : "Islaamka waxa lagu dhisay shan, 1. ka markhaati kaca in aan ilaah xaq lagu caabudaa jirin ilaahay mooyee iyo ka markhaati kaca in Muxamed 'scw'yahay Rasuulkii uu soo diray, 2. Salaada oo la tukado, 3. Bisha ramadaan oo la soomo, 4. Zakada oo la bixiyo, 5.Xajka oo la guto".

Waxa weriyey Bukhaari iyo muslim.

MACNAHA SOONKA.

Erayga soon wuxuu leeyahay labo macno oo kala ah: Luqo IYO Isdilaax.

Luqo ahaan erayga "Soon" macnahiisa waa kajoogsasho sida: hadalka, , cabidda, cunidda, i.w.m.

ALLAAH wuxuu yiri isagoo inooga waramaya maryama bintu cimraan (...waxaad dhahdaa anigu waxaan ugu nadray (eebaha) raxmaan oon u soomi oonan la hadlin maanta cidna).[maryam 26] .

Kalmadda "Soon" ah ee ku jirta aayadda macneheeda waa Aamusitaan.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Isdilaax ahaan (macnaha sharciga dhexdiisa looga yaqaano erayga Soon) waa in laga joogsado ama la iska ilaaliyo waxyaabaha ruuxa sooman afuriya laga bilaabo waabariga illaa qorraxda ay dhacdo iyadoo soonka la niyaysan yahay.

Imaamka Ibnu Xajar, wuxu yidhi: "Macnaha Soonku Luqada carbeed waa haysasho ama ka joogsi, shareecaduna waxay uga jeedaa ka joogsashada Cuntada,cabista, Galmada iyo hadalka xun [laga bilaabo salaada subax ilaa qorax dhaca] ".

Imaamka qurdubi wuxu yidhi: "Soonku shareecada waa in laga afhaysto waxyaalaha lagu afuro iyadoo aad niyadana la imanaysid, laga bilaabo dillaaca waaga ilaa qorax dhaca, waxaana kuu dhamys tiraya soonka inaad ka fogaato dhamaan waxyaalaha laguu diidey iyo in aanad ku dhicin xaaraan.

Soonka waxaa la Faral yeelay sanadkii labaad ee hijrada, nebiga NNKH wuxuu soomay sagaal soon.

XUKUNKA SOONKA.

Soonka bisha Ramadaan waa waajib dhamaan muslimiinta cidii sharcigu gaar uga soo reebay mooyane, Waajibnimada soonkuna waa mid ku sugan kitaabka quraanka ah iyo sunada nabiga (s.c.w) ummada islaamka ahna way isku wada raacsantahay.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Si guud ahaaneed waajibnimada soonka wuxuu ALLE inoogu caddeeyey aayaddan hoose: (Kuwa xaqa rumeeyow waxaa laydinku waajibiyay soonka sidii looguwaajibiyay kuwii idinka horreeyay si aad u dhawrsataan –ilaa – waa maalmo tirsan...) [al-baqarah 183-184].

Gaar ahaan waajibnimada soonka bisha ramadaan Alle wuxuu inoogu sheegay aayaddan hoose : (Waa bisha soon ee la soo dajiyey dhexdiisa quraanka, isagoo hanuun dadka u ah, iyo caddayn hanuun iyo kala bixin (xaqa iyo baadhilka) ee ruuxii jooga {nagi} ha soomo). [al-baqarah 185].

(Islaamka waxaa lugu dul-dhisay shan korkood: Qiritaanka {laqiro} in ilaah aan ALLAAH ahayn uuna jirin Muxammadna adoonkiisii iyo rasuulkiisii yahay iyo Salaadda toosinteeda {oogiddeeda} iyo Sakada bixinteeda iyo Baytka (kacbada) ku xajintiisa iyo Soonka {bisha} ramadaan).

Walaalayaal rasuulka (s.c.w) wuxuu xadiiskan saxiixa ah inoogu caddaynayaa inuu soonka yahay tiir kamid ah tiirasha shanta ah ee islaamka ku dul dhisan yahay, tiirashaasoo haddii lawaayo islaamnimada jiraynin, sababtoo ah majiro guri tiir la'aan taagnaan karo sidaa daraadeed ruuxii kataga soonka bisha ramadaan waa ruux dumiyay tiir kamid ah tiirashii islaamka uu kutaagnaa.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Ibnu kathiir wuxuu tafsiirkiisa ku sheegay in uu imamu Axmad yiri isagoo Mucaad binu jabal kasoo warinaya (r.c) waxaa salaadda la wareejiyey (isbad-badal ku yimid) saddex jeer, soonkana waxaa la gad-gadiyey (isbad-badal ku yimid) saddex jeer, wuxuuna sheegay isbad-badaladii ay salaadda soo martay kadib isbadbadalkii soonka wuxuu ka yiri: rasuulka (s.c.w) ayaa madiina soo galay wuxuuna gudagalay inuu bil kasta saddex bari kasoomo maalinta Caashurana uu soomo kadib Alle ayaa ku faradyeelay soonka oo ku soo dajiyey : (Kuwa xaqa rumeeyow waxaa laydinku wajibiyay soonka –illa laga gaaro hadalka Alle ee ah –kuwa uu dhibina waxay bixin {quudin} miskiin), Markaa ruuxii rabana wuu soomayey ruuxii rabana miskiin ayuu quudinayey soonkana sidaa ayuu kaga gudmayey kadib Alle wuxuu soo dajiyay aayad kale: (Waa bisha Soon ee la soo dajiyey dhexdiisa quraanka, isagoo hanuun dadka u ah, iyo caddayn hanuun iyo kala bixin (xaqa iyo baadilka) ee ruuxii jooga {nagi} ha soomo). [al-baqarah 185].)

Allaah wuxuu soonkii bisha ramadaan ku dul sugay ruuxa fayoow ee nagi wuxuuna u rukhseeyey ruuxa musaafirka ah iyo midka buka (xanuunsan), quudintii masaakiintana wuxuu u sugay ruuxa da'da ah ee soonka awoodi Karin, taasi waa laba isbadal, sidoo kale waxay

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

ahaayeen muslimiinta kuwo cabba oo cuna dumarkana u taga inta ayna seexanin hadayse seexdaan saddexdan arimoodba (cabbid, cunid iyo u tagida dumarkaba) mamnuuc ayey ka aheyd, kadib nin reer ansaareed kamid ah oo la dhihi jiray Sirmah ayaa shaqayn jiray isagoo sooman habeen ayaa markuu reerkiisii yimid oo salaaddii cishe uu tukaday ayuu iska seexday isagoon waxba cunin waxna cabbin ilaa uu waabariistay isagoo sooman markaa rasuulkaa (s.c.w) isagoo aad u dhibaataysan wuxuuna ku yidhi: (Maxaa iigu wacan oon kuu arkaa inaad rafaadday rafaad daran !), Markaa ayuu uga waramay xaaladdiisa cumarna dumarkiisii ayuu u tagay intuu seexday, kadib rasuulka ayuu u yimid kadibna u sheegay arinta, Alle ayaa soo dajiyey: (Waxaa laydiin banneeyey inaad habeenka soonka is aragtaan haweenka–illaa laga gaadho hadalka ALLE ee ah- dhamaystirana soonka tan iyo habeenka.).

Waa marxaladdii ugu danbaysay ee kamid ahayd marxaladihii uu soonka soomaray sidaa ayeyna waajib ku noqotay in bisha ramadaan oo idil lasoomo inta ay qorraxda soo jeedo.

Waxaa la wariyey in rasuulka (s.c.w) uu soomay sagaal Soon dhamaantoodna waxay ahaayeen 29 maalmood (mid aan soddon buuxe ahayn).

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

(Abiihurayrah (r.c) wuxuu yiri: xilligii rasuulka intaan sagaal iyo labaatan soonnay ayaa ka badnayd intaan soddon soonnay) [ibnu majah].

Sida uu ibnu kathiir tafsiirkiisa ku sheegayo soonka waa cibaado horaysay oo soo bilaabatay xiligii nabi nuux (c.s) ilaa xiligii nabigeena (s.c.w) sida uu ALLE quraanka inoogu sheegay.

Muslimiintuna waxay isku Raaceen [ijmaac] in soonka bisha Ramadaan yahay faral, waana waxyaalaha ay daruuriga tahay in qofka muslimka ahi ogaado oo aanu jaahil ka noqon karin, qofkii diida ama inkira soonka bisha Ramadaan wuu gaaloobayaa, waxana la waydiinayaa inuu toobad keeno, hadii uu diido waa la dilayaa iyadoo xukunka murtadka [gaaloow] lagu qaadayo, lagu tukan maayo, loona ducayn mayo, qubuuraha muslimiintana lagu aasi mayo, illaahna SW wuxu yidhi: "Kuwii Iimaanka laga helayoow, waxa laydinku faral yeelay soonka , sidii ummadihii idinka horeeyeyba loogu faral yeelay, waxaad mudan tihiin inaad cabsataan". AL BAQARA 183.

FAA'IIDADA AAYADA.

*** In soonka xukunkiisu faral yahay .**

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

*** In soonka umadihii inaga horeeyey lagu faral yeelay.**

*** In xikmada soonku tahay ilaah ka cabsi.**

SOONKA IYO ABAAL MARINTIISA.

Soonka oo ah cibaado illaahey loogu dhawaanayo oo uu inagu faral yeeley, illaahey ayaa iska leh soonka oo qofkii soomana abaal marintiisa siinaya.

Illaahey SW wuxuu xadiisul qudsi ku idhi "Camalada dhamaan ibni aadamka ayaa iska leh, soonka mooyaane ,soonka anigaa iska leh , anigaana mushqaayadiisa bixinaya, soonku waa gaashaan, midkiin marka uu sooman yahay yaanu qaylin (muran & Dood) , yaanu Af xumoon, hadii qof caayo ama la diriro ha yidhaahdo anigu waan soomanahay, Ilaahii nafta Muxamad Gacantiisa ku jirtay ayaan ku dhaartee , Bukhuurka afka Qofka sooman kasoo baxayaa Ilaahay agtiisa wuu kaga udgoon badan yahay uduga miskiga, Qofka soomani wuxu leeyahay laba farxadood, Farxad markuu afuro oo uu ku farxayo soonkiisa, Farxadda labaad oo ah markuu ilaahay la kulmo wuxu ku farxayaa soonkiisa".

Waxa weriyey labada sheikh.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

FAA'IIDADA XADIISKA.

 # In Ilaahay si gaar ah u sheegtay soonka , camalada kalena uu yidhi waxa iska leh bani aadamka, waayo soonka masoo geli karaan istus iyo is maqashiin, halka camalada kale ay soo geli karto in qofku wax kale cid kaga doonayo.

 # Soonka in illaahey yidhi anigaa mushqaayadiisa<abaal marintiisa> si gaar ah u bixinaya mana sheegin inta uu leeg yahay, lakiin waxa la rajeynayaa in uu ahaado mid weyn oo uu qofku ku farxi doono marka uu illaahey SW la kulmo.

 # Qofku markii uu sooman yahay inuu soonkiisa dhawrto kana taxadaro wixii wax u dhimaya soonkiisa, ajarkiisana nusqaaminaya, oo hadii qof kusoo xad gudbo waa inuu usheegtaa inuu sooman yahay, oo uu soonkiisa alaashanayo, oo aanu dhib geysan, af xumada iska ilaaliyo.

 # in soonku uu gaashaan ka yahay dhamaan waxyaalaha xun xun iyo shahawaadka naftu ay dooneyso.

 # Qofku in uu ku farxo markii uu cibaadada dhameysto sidii illaahey SW farey.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

SOONKU CIDUU KU WAAJIBEY.

Soonku wuxu ku waajibey cida Shuruudahan leh:-

*** Qof kasta oo muslim ah.**

*** Qaan gaadh ah. Caqli fayow leh.**

*** Aan bukin.**

*** Aan Safar ku jirin.**

*** Ka nadiif ah Dhiiga Caadada & Dhalmada, tan oo Dumarka ku gaar ah.**

*** Hadii ay tahay hooyo uur leh ama Nuujinaysa waxay ku xidhan tahay hadba sida ay u awoodo.**

*** Qofka waayeelka ahi wuxuu la xukun yahay dadka aan caafimaadka qabin ee cudur daarka leh.**

SOONKU CIDAANU KU WAAJIBIN.

Soonku kuma waajibo cida laga helo astaamahan:-

*** qof aan muslim ahayn.**

*** Qof aan qaan gadh ahyn.**

*** Qof dhimirka ka buka ama dhiman.**

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

*** Qof buka.**

*** Qof Socdaal ah.**

*** Gabadh leh dhiiga Caadada ama Dhalmada.**

*** sadexna wax takliif ahi ma saarna, Qofka gaalka ah cibaadadu kama ansaxayso ilaa uu islaamo, Qofka Waalan, Qofka aan qaan gaadhin.**

Qofka waalan iyo kana an qaan gaadhin waxa si gaar ah u sheegay xadiiska nebiga NNKH wuxu yidhi: "Qalinka waa laga kor qaaday sadex, kan waalan ilaa uu miyirsado,kan hurda ilaa uu baraarugu, kan ilmaha yar ah ilaa uu qaan gaadho". Markaa sadexdaa wax takliif ahi ma saarna.

Qofka yare ee aan qaan gaadhin soonka waa la amaryaa inuu soomo si uu ugu tababarto hadhowna ay ugu fududaato.

Saxaabadu caruurtooda way soomin jireen sida ay sheegtay Gabadha Rubayac bint Mucawada waxay tidhi: " Rasuulku NNKH subaxii cashuuraa, wuxu xaafadihii Ansaarta u soo diray in Qofkii waagu u beryey isagoo sooman, ha dhamays tirto, Qofkii isagoo affuran waagu u beryeyna ha aff xidhnaado".

Intaa ka dib waanu soomi jirney (waxay u jeeda maalinta cashuura oo ah tobanka bisha Muxaram), Caruurta yaryarna waanu soomin

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

jirney, waxanu geyn jirney masaajidka, waxanu u samayn jirney Cayaar ka samaysan Suuf, marka ay cunto u ooyaan ayaanu siin jirney si ay ugu mashquulaan ilaa affurka la gaadho, Waad garan kartaa qofka yare ee marka uu cunto u ooyo lagu jeedinayo cayaar yar oo suuf la duudubay ah inta uu leegyahay, inagana waxa laga yaabaa in qofkii yaraa oo awoodi kara inuu soomo aan lagu dhiiri gelin inuu soomo.

XIKMADA IYO FAIIDOOYINKA KU JIRA SOONKA.

Ilaahay SW wax kasta oo uu abuuray iyo sharci ama cibaado kasta oo uu jideeyey wuxu ka leeyahay xikmad iyo ujeedooyin qiima badan oo uu uga jeedo, xikmadahaas aan inagu garano ama aan ka jaahil noqonee waxa waajib ah in aan ilaahy ku adeecno.

 # Inuu yahay Cibaado u dhaxaysa ilaahay iyo adoonka, adoonkuna sidaa ku fulinayo maadaama ilaahay amray, marka uu fuliyona wuxu ku helayaa abaal marin fiican.

 # Soonku wuxu sabab u yahay in adoonku ilaahy ka cabsado, iimaanka iyo cabsida ilaahayna kor ayuu u qaadaa soonku, waana mid ka mid ah xikmadaha ilaahay u waajib yeelay, sidii aan hore u sheegnay.

 # In adoonku ka garaabo ama aqoonsado nicmooyinka faraha badan ee ilaahay ku galadaystay ,sida cuntada , cabista, gudashada

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

shahwada , oo marka uu iska daayo uu garan karo hadii uu waayo, in uu sidan oo kale u dhib mudanayo.

Taasina waxa ka dhalanaya inuu shukriyo, sidii ilaahyba SW uu yidhi.

 # Soonka waxa ku jira in qofku naftiisa ka adkaado oo uu u diido waxyaalo aanay ka maarmi Karin, isagoo ku tababaranaya inuu wax naftu doonayso ka joojiyo, ee aanay iyadu mar kastaba hogaamin, taas oo keenaysa inuu kaa hor joogsan karo xaaraanta ay doonayso inay ku dhacdo.

 # Waxa ku jira soonka in la cidhiidhyo wadooyinka shaydaanku jidhka ku leeyahay, Waayo shaydaanku wuxu jidhka bani aadamka ka maraa meelaha dhiigu maro iyo curuuqaha.

 # Waxa ku jira soonka in qofku u naxariisto walaalihiisa kale , gaar ahaan masaakiinta , taasoo uu dareemi karo dhibta gaajadu leedahay.

 # Soonka waxa ku jira faa'iidooyin dhinaca caafimaadka ah, taas oo dhakhaatiirtu cadeeyeen.

 # in qofka ay u sahlanaato inuu cibaadooyin badan samayn karo, waayo wuxuu naftiisa ku layliyey cibaado aad u culus oo soonka ah, wixii kalena way u sahlanaanayaan.

 # Waxa lagu bartaa soonka samirka iyo dulqaadka.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

 # Soonku waa fursad lagu joojin karo dhamaan caadooyinka xunxun iyo balwadaha.

WAXYAABAHA BANAAN SOONKA DHEXDIISA.

Waxa jira in dadka soomani waxyaalo aan soonka shido u lahayn ay ka feejignadaan iyagoo moodaya in uu dhib leeyahay, bal hadaba aan wax ka tilmaano waxyaalaha aan soonka dhibta u lahayn hadii qofku sameeyo:-

1. Qofka sooman waxa u banaan in uu qubaysan/maydhan karo labada gelinba, weliba hadii uu uga jeedo in naftiisu ku ilowdo soonka iyo haraadka wax dhib ah ma laha, hadii uu jidh ahaan dhex muquurto oo uu aamin ka yahay in aanay afka iyo sanka wax biyo ahi ka gelayn way u banaantahay inuu muquurto.

Saxaabi ayaa laga soo weriyey inuu yidhi " Waxan arkay Rasuulka oo jooga meesha Caraj la yidhaahdo, isagoo ku shubaya madaxiisa biyo, isagoo sooman, haraad dartii ama kulayl dartii.

2. Cadaygu labada gelinba wax dhibaato ah ma laha , culimada qaarba yare kahday maadaama uu urtii afka kaxaynayo, urtaas oo ilaahay agtiisa ka udgoon badan miskiga.

Nebigu NNKHH wuxuu yidhi " Hadii aanan mu'miniinta ,ama Umadayda dhibayn waxan amri lahaa cadayga salad kasta". Waxa wariyey labada sheekh.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

3. Waxa u banaan inuu Cadar marsan karo, ama indho kuusho, ama subkan karo.

4. Waxa u banaan hadii uu u baahdo inuu cunto dhadhamiyo, isaga oo aan laqayn ee tufaya.

5. Irbadaha aan ahayn cuntada ama fitamiinada nafta gelinaya awooda way banaan yihiin hadii qofku isku mudo caafimaad awgiis.

6. Waxa u banaan inuu xaaskiisa dhunkan karo, lana faro-ka ciyaari karo, waa hadii uu aamin ka yahay inuu galmo ku dhaco ama biyo ka soo baxaan, Waxa sidaa sheegaya xadiiska rasuulka ay ka sheegtay caa'isha Rc, Caa'isha waxay tidhi:- " Rasuulku NNKH wuxu ahaa mid dhunkada isagoo sooman, wuu taataaban jirey(Xaaska) isagoo sooman, laakiin wuxu ahaa mid is xejin kara.(Xubintiisa ka adag)."

Culimadu waxay yidhaahdeen " dhalin yarada aan is xejin karayn ha ka fogaadeen inay dumarka ka ag dhowaadaan, waayo hadii uu ku tala xumoobo wax ka dhalanaya kafara gud culus, Maxaa yeelay nabad gelyada wax loo dhigaa ma jiraan".

AADAABTA SOONKA.

Qofka Sooman waxa laga doonayaa inuu raaco adaabta soonka oo culimadu ilaa todoba meelahaa gaadhsiiyaan:-

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

1: Suxuurta.

2: Dedejinta Affurka.

3: Inuu ducaysto marka uu afuro.

4: Inuu ka fogaado waxyaalha soonka dhaawacaya.

5: Inuu gacanta furo.

6: Inuu Quraan badan akhriyo.

WAXYAABAHA QOFKA MUSLIMKA AH SOONKA KA JEBIYA.

1. **in qofku gaaloobo (ilaah ayaan ka magan galay), sida isagoo diinta caaya ama Rasuula iwm.**
2. **inuu u badheedho inuu wax cuno ama cabbo, xataa haduu niyeeyo way ka jabaysaa yaanu wax cunin ama cabine.**
3. **inuu iska matajiyo si badheedha.**
4. **inuu biyaha taranka iska keeno si u kas ah, galmo ha sameeyo ama si kaleba ha uga yimaadaane<isagoo hurda hadey ka imaadaan kama jabayo soonku, waayo rasuulka NNKHH ayaa xadiis saxiixa inoogu sheegey in qofka hurda ilaa uu kazoo tooso waxba laga qorey>.**

5: inuu is toobbo.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

6: inuu isku durro dawooyinka vitaminka ah ama cuntada u dhigma.

7: Imaashaha dhiiga Caaddada ama Dhalmada ee dumarka.

SUAAL MUHIIMA U AH SOONKA.

Su'aal: Hadii Qofku Afuro dabadeed Diyaaradi la kacdo qoraxdiina uu arko iyadoo aan dhicin muxuu yeelayaa?.

Jawaab: Qofkii ku afura beled ama magaalo ka dib diyaaradi la kacdo , ama wuxu afuray diyaardii oo aan kor u kicin, Gabalkiina uu dhacay, dabadeed qoraxdii ayuu arkay markii diyaaradii cirka sare gashay, Qofkasi wuu iska afuraanayaa, Sidaana waxa fatwooday Sh. Cabdi Risaaq cafiifi, Sh IBn Baaz, Iyo Sh. IBn Cuthaymiin.

SOONKA AAN BANAANEYN.

1: AYAAMA TASHRIIQA:-

Soonka maalmaha Tashriiqa oo ah sadexda cisho ee ka danbeeya maalinta Ciidul udxiyaha, nebigu wuu diidey in la soomo.

RASUULKU NNKHH waxana uu ku tilmaamay inay yihiin maalmo waxa la cuno lana cabbo, Saxaabi ayaa wuxuu yidhi " Nebigu NNKHH wuxu udiray saxaabiga cabdulaahi bin Xudaafa mina, wuxu yidhi, Ha soomina maalmahan waa maalmo wax lacuno waxna la cabbo, ilaahayna la xuso".

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Mad'habka shaaficiya wuxu baneeyey soonka sababta leh, in maalmahan la soomi karo, sida soonka nadarka , soonka kafaarada ka waajiba iwm.

2: SOONKA SHAKIGA:-

Soonka Maalinta Shakiga, nebigu NNKH wuu diidey.

Nebigu NNKHH waxa uu xadiis ku yidhi: "Soonka hakala hor marina maalin ama laba maalmood, inuu yahay soon hore uu u soomi jirey mooyee, markaa ha iska soomo".

Haddii soonku yahay mid qofku hore u soomi jirey sida maalmaha isniinta & khamiista oo uu ku soo beegmo soonkii Ramadaan maalin ama laba ka hor wuu soomayaa, waxa kale oo la mid ah hadii uu qale waajib ah lagu lahaa oo uu ka dedejisanayo inta aan soonku soo gelin.

Imaamka abuu ciise Tarmadi wuxu yidhi: " sidaa ayaa ahlu cilmigu badidoodu ku tageen".

Hadaba hadii qofku is yidhaahdo ka hor deg oo yaan soonku ku dhaafin ma ansaxayo ee waxa la doonayaa in yaqiin lagu soomo.

3: SOONKA JIMCAHA & SABTIDA:

Soonka Sabtida iyo jimcaha oo mid kastaba gaar soonka lagaga dhigo isagana nebigu NNKH wuu diidey.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Nebigu NNKHH wuxuu xadiis ku yidhi: "Ha soomina maalinta Sabtida ,soon faral ah mooyee, xataa hadii aad waydaan diir cinab maahee wax kale , ama laan geed maahe wax kale ha calaashado".

Xadiisku wuxu inoo sheegayaa in maalinta sabtida aan keligeed la soomin, waxa nebigu ku macneeyey in ay tahay maalin ay yuhuudu wayneeyaan, waxa kale oo nebiga laga weriyey inuu soomi jirey labada maalmood ee axada iyo sabtida oo odhan jirey waxan u soomayaa waa laba maalmood oo ahlu kitaabku wayneeyaan aniguna wan khilaafayaa.

Sidoo kale Nebigu NNKHH uu diidey in jimcahoo kaliya lasoomo waxaanu yidhi "Qofna yuu soomin maalinta jimcaha ,inuu maalin ka horaysa ama ka danbaysa soomo mooyaane".

- Soonka jimcaha oo keligii la soomo isagana sida xadiiska ka muuqata Nebigu wuu diidey, Waayo jimcuhu waa ciidka Asbuuca ee muslimiinta, markaa in soon lagu gaar yeelo maaha , laakiin fuqahadu intooda badan waxay u arkeen karaahiyo aan sidaa u sii cuslayn, laakiin xadiiska nebiga NNKH ayaa daliil u ah.

4: SOONKA SANADKA OO DHAN:-

Sanadka oo dhan in qofka muslimka ahi soomanaado isagana Nebigu NNKH wuu diidey wuxu yidhi: "Soon uma jiro Qofka weligii Soomanaada".

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

SOONKA SUNNAHA AH.

Soonka sunnaha ahi ma laha xadid sida kan bisha ramadaan, qofku maalinta uu doono ayuu soomi karaa isaga oo iska ilaalinaya soonka maalmaha aan banaaneyn ee aynu hore usoo sheegney.

SOONKA SHUWAALKA.

Soonka shuwaalku waa soon sunne ah waana lix cisho, lixda cisho ee shuwaal waa sunne ka sugan nebiga SCW, waxaanu xadiis ku yidhi: "Qofkii sooma Ramadaan ka dib raaciya lix shuwaal ah ,wuxu la mid yahay qof sanadka soomay".

Xadiiskani wuxuu inagu boorinayaa in aan soono lix casho oo shuwaal ah, taas oo marka lagu daro bisha ramadaan u dhiganta sanad soonkii waayo xasanadu waxay labanlaabantaa toban jeer iyo ka badan, markaa lix iyo sodanka casho ee isugu jira Ramadan iyo shuwaal waxay u dhigmaan 360 casho oo soon ah, sidaa ayey sanad ku noqonayaan.

Israacinta shardi uma aha shuwaalka sida ka ramadaanta, qofkana wey u banana tahay inuu doorto ayaamuhuu ka soomayo bisha shuwaal lkn waa iney ahaadaan uun lix cisho, Lixdan maalmood malaha wakhti la xadidey balse waxa laga dhex soomaayaa bisha shuwaal lix cisho oo kamida uun, ramadankana waa lagu daba qaban karaa iyagoo is raacsan ama kala go'an intuba way banaan tahay,

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

lakiin xanafiyada iyo shaaficiyadu waxay yidhaahdeen in soonka lagu daba qabto ayaa afdal ah, xanbaliyadu waxay yidhaahdeen waa la kala gogoyn karaa oo dhib maleh.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

3.SALAADA IYO RAMADAAN.

- Salaadu waxey ka mid tahay Arkaanta islaamku ku taagan yahay ee shanta ah, la aanteedna diintu ma ansaxdo.

Rasuulku wuxu yidhi : "Islaamka waxa lagu dhisay shan, 1. ka markhaati kaca in aan ilaah xaq lagu caabudaa jirin ilaahay mooyee iyo ka markhaati kaca in Muxamed 'scw'yahay Rasuulkii uu soo diray, 2. Salaad,a oo la tukado, 3. Bisha ramadaan oo la soomo, 4. Zakada oo la bixiyo, 5. Xajka oo la guto ". Waxa weriyey Bukhaari iyo muslim.

Marka laga imaado salaadaha faralka ah, bisha barakeysan ee ramadaan waxa sunne la adkeeyey ah in la tukado salaadaha sunnaha, inkastoo markasta sunnuhu taagan yahay hadana fadliga bisha ramaadaan ayey waajib tahay inuu qofku naftiisa kusii adkeeyo si uu u helo kheyrka bishan lagu gaar yeelay.

SALAADA TARAAWIIXDA:-

Salaada taraawiixda oo la tukado bisha Ramadaan asalkeedu wuxu ka soo jeedaa Salaada habeenka la tukado oo ay banaan tahay in qofku fiidka sii tukan karo hadii uu sidaa dan moodo , ama ka baqo inuu habeenka saqda dhexe kici waayo.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Hadaba salaadan oo markeeda hore ah sunne , waxa la sharciyeey in qofku gaarkiisa u tukado, laakiin jamaacana waa lagu tukan karaa, bisha Ramadaan, sida ka sugnaatay nebiga NNKH inuu jamaaco ku tujiyey Saxaabadiisa:- " Waxaanu la tukaney Nebiga NNKH, habeenkii saddex iyo labaatanaad ee bisha Ramadaan, ilaa sadex meeloodka hore ee habeenka, hadana waxanu la tukaney habeenkii shan iyo labaatanaad ilaa habeenka kala badhkiisa, hadna waxanu la tukaney habeenkii todoba iyo labaatanaad ilaa aanu u malaynay in suxuurtu naga tageyso, suxuurtana waxanu u niqiin ,liibaan"

Xadiiskan oo saaxadiisu sugan tahay, wuxu inoo sheegayaa in nebigu saxaabadiisa tujiyey salaadan taraawiixda iyadoo jamaaco ah, Daliilka ku soo aroorayna wuu badan yahay.

FADLIGA SALAADA TARAAWIIXDA:-

Salaada taraawiixda oo la tukado wuxuu nebigu ku sheegay fadli weyn wuxu yidhi:-

"Qofka la tukada imaamka ilaa uu ka baxo[salaada] waxa loo qoraa habeenkaa qof tukadey [salaatu laylkii].

- Tan waxey inoo cadaynaysa fadliga iyo qiimaha weyn ee uu leeyahay salaada Taraawiixda oo la tukadaa.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

WAKHTIGA SALAADA TARAAWIIXDA:-

Waqtiga tarawiixdu wuxu la mid yahay salaatu laylka caadiga ah, waxana banaan in qofku habeenka bilowgiisa tukan karo, weliba hadii uu ka baqo inuu saqda dhexe toosi waayo, abuu hureyra ayaa yidhi:- " Saxiibkaygii wuxu ii dardaarmay sadex, kamana tegayo ilaa aan geeriyoodo, Bil kasta inaan sadex casho ka soomo, Salaada Barqada, inaan witrida ku seexdo. ".

Markaa qofku wuu qadiman karaa salaatu laylka , wayo witrigu isagaa salaada habeenkii ugu danbeeya oo wax salaad ah oo ka danbeeyaa ma jiro ee waa lagu soo khatimaa, , in kasta oo ay banaan tahay in qofku hadii uu witri tukado oo hadana habeenkii jaanis u helo inuu salad u kaco wuu tukanayaa , laakiin witri danbe ayaanu la imanaynin, waayo habeenka laba witri kuma jiraan, Laakiin waqtiga ugu fadliga badani waa in la tukado saqda dhexe sida nebigu inagu dhiiri geliyey markii uu yidhi: " Salaad tan ugu fadliga badani, Faralka ka dib waa salaada saqda dhexe".

TIRADA SALAADA TARAAWIIXDA:-

Sida aynu sheegnay Taraawiixdu waa Salaadii habeenkii [salatu layl], tiradeeduna xadi lagu soo koobay ma laha ee qofku inta uu kari karo ayuu ka tukan karaa, Sidaa waxa inoo tilmaamaya xadiiska Nebiga

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

NNKH uu yidhi:- "Salaada Habeenkii waa laba laba, hadii qofkiin waaga ka baqo[berigiisa], rakcad keliya ha tukado, oo witri uga dhigta salaadisii".

FAA'IIDADA XADIISKA:-

1: In salaada hbeenkii laba laba rakcadood tahay.

2: In aanay xadi lagu soo kobo aanu jirin ee ilaa waagu soo dhowaado la wadi karo, hadba inta qofku kari karo.

3: In Salaada habeenkii lagu soo afjarayo hal rakcad oo witri ah.

Hadaba in kastoo aan xad loo yeelin haddana waxa jira in aanu nebigu NNKHH ka badinin 11 rakcadood, waxa fiican in sunnaha nebiga qofku qaato.

Xaaskii rasuulka caasha ayaa waxey tidhi " ma aheyn rasuulku NNKHH midka ka kordhiya ramadaan iyo qeyrkeed, 11 rakcadood. "

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

4.QURAANKA IYO RAMADAANTA:-

Qur'aanku waa hadalkii Alle SWT, hadal ka saamayn badani ma jiri karo, Qur'aanku waxna wuu ina farayaa waxna wuu inooga digayaa, sidoo kale wuxuu inooga waramaa qisooyin dhacay, isagoo inooga digaya tubtii lagu halaagay in aynu qaadno.

Qur'aanku wuxuu ka waramaa janno iyo naar, taas oo ah halka lagu kala aroorayo, In baddan wuxuu ka waramaa labadaa waxa dhex yaal, Sidoo kale Qur'aanku waa hagihii aadamaha iyo qodobadii lagu dhaqmayey halkaa laga qaadanayo.

Wuxuu iftiinshaa qofka iyo xaqa Illaahay SWT ku leeyahay, Qofka iyo xaqa naftiisu ku leedahay, Qofka iyo xaqa waalidkiisu ku leeyahay, Qofka iyo xaqa ooridiisu ku leedahay, Qofka iyo xaqa mujtamacu ku leeyahay, Sidoo kale axkaamaha Guurka, Dhaxalka, Ganacsiga, Salaadda, Daharaada, Xajka iyo Soomka ayuu inooga waramaa.

Sidoo kale axkaamo faro baddan oo siyaasaddii nolosha lagu hagayeyna ka mid tahay ayuu Qur'aanka Kariimka ahi ka hadlaa, Markaa waa dastuurkii Alle SWT ummada soo raaciyey si ay isugu xukumaan.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

RAADEYNTA UU QURAANKU KU YEESHO QALBIYADA:-

Dhibaatooyinka jira waxa ka mid ah in mujtamaceenu aanu isku hawlin barashada iyo fahamka Qur'aanka Kariimka ah, Taas oo ay keenayso in fikirro shisheeye dadkan lagu saameeyey, laguna kala fogeeyey luuqadi Qur'aanku ku qornaa iyo iyagu inay is fahmaan.

Qur'aanku wuxuu leeyahay raadayn faro badan oo uu qofka ku reebo, Inta u qofku fahmayana qalbigiisa u ruxo, gilgilo iyo xasilooni saamayn aan xad lahayna qofka uu ku rido, balse taas waxa ka ooman oo ka aradan qofka Qur'aanka Kariimka ah aanay is fahmayn.

Waxa aynu soo qaadan doona dhawr tusaale oo muujinaya cid Qur'aan dhagaystay oo uu raadayn ku yeeshay, Cidaasi ha ahaato Malaa'iig, Jiman iyo Insiba.

Asxaabigii la odhan jiray Sayd Ibnu Xudayd ayaa waxa uu yidhi "habeen ayaan Salaatul-layl tukaday, Waxa aan akhriyey suratul Baqara, anigoo sidii u akhrinaya ayaan arkay fardihii ii xaraysnaa oo diday, waxa aan joojiyey Qur'aanki aan akhrinayey, way aamuseen oo cidii iyo xeeradi ay gilgilayeen joojiyeen, haddana Qur'aanki ayaan akhrintiisi bilaabay iyaguna intii ayey haddana bilaabeen, Markii dambe ayaan cirka eegay mise waa daruur aniga aad moodo inay igu soo dagayso oo aad igu dhaw, Aroortii ayaan Rasuulki CSW intii u

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

sheegay wuxuu igu yidhi akhri Ibnu Xudaydoow Qur'aanka walaahi Malaa'iig ayey ahaayeene".

Cajiib!!!!!

Haddaba is weydii oo Ibnu Xudayd iyo malaa'iigtu inay sidaa isugu soo dhawaadaan maxaa keenay?.

Waa Qur'aanka uu akhrinayey, ee qof yahoow haddii aad doonayso in sidaa aad ahaato joogtee akhrinta Qur'aanka.

Habeen ayaa Rasuulka CSW oo akhrinaya Qur'aan waxa maqlay koox ka mid ah jinka, dabadeed is aamusiiyeen iyagoo leh "aamusa aamusa" ka dib sida u Qur'aanku ka waramay waxay noqdeen iyaga oo digayaal ah, markii ay noqdeena waxa ay tolkood ku yidhaahdeen "waxa aanu maqalnay Qur'aan la yaab leh, oo kugu hagaya hanuun, waanu rumaynay anagu, Illaahayna cid la wadaajin mayno".

Waxa aad arkaysaa in isla markiiba iimaanku qalbigooda galay, taas waxa keenaysa fahamkii ay Qur'aanka Kariimka ah fahmeen inuu hadalkii Illaahay SWT yahay, Markii ay dhegaysteenba waxay isu rogeen digayaal, Adiguna intaasaad dhagaysanayse maalin uun aayaad Qur'aan ah oo aad dhagaystay waxay ka hadlaysay dadka ma uga warantay?.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Nin la odhan jiray Fudayl Ibnu Ciyaad ayaa wuxuu ahaaba la yidhi tuug dadka dhaca, oo shufto ah, habeen ayuu oday usoo dhacay isagoo doonayaa inuu xado, odaygu wuxuu tukanayaa Salaatul-layl, wuxuu maqlay odaygii oo akhrinaya aayada Qur'aanka ah ee odhanaysa "waar miyaanay gaadhin kuwa iimaanka laga helay in xuska Alle qalbigoogu u jilco".

Fudayl ayaaddaasi qalbigiisa waran ayey ku noqotay, ka leexisay wuxuu u socdayba, Odaygii ayuu ag fadhiistay isaga oo ku leh waar Qur'aanka igu akhri, odaygiina inta uu yaabay ayuu ku yidhi waar maxaad ahayd, waar xageed iga timid xilligan, Fudayl Ibnu Ciyaad halkaa wuxuu ku noqday nin wixii ka toobad keena, wadaad aad u caan baxay ayuu ku dambeeyey Fudayl Ibnu Ciyaad oo markii uu usoo gabyayey Cabdilaahi Bin Mubaarak waa kii ku lahaa "waar kii labada Xaramayn ugu cibaadada badnaayow".

Darajada muxuu ku gaadhay Fudayl, waa Qur'aanka qalbigiisa tuujiyey.

Walaalayaal haddii aynu is nidhaa ka hadla raadaynta Qur'aanka ka geyoon mayno dhamayna kari mayno, balse inaga intee ayuu qalbigeena taabtaa mise maba fahano. ? Markii ay reer yurub kusoo duuleen Falastiin ayaa janankii ciidanka watay yidhi waar haddaba kitaabkan iyo iyaga sidee ayeynu u kala fogaynaa, mid askartiisi ka

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

mid ah ayaa kitaabkii inta u qabtay jeex jeexay, markaasuu ku yidhi janankii waar sidan maaha, sida aan doonayaa waa in qalbigooda aynu ka masaxno oo is fahamka ay is fahmaan kala kaxayno, Waxa marag ma doon ah in tiina ay dhacday.

Dunida Islaamka ee aan carabta ahayni barashada luuqada Carabiga liidnimo ayey u arkaan maanta, halka carabtiina qudhoodu u baahan yihiin in iyaga laftarkooga loo macneeyo Qur'aanka waayo lahjado kale ayey qaateen oo iyagiibaaba u baahan intooda baddani in loo macneeyo.

Walaalayaal gun iyo gunaanad waa in aynu wakhtigeena qayb ka mid ah u hurnaa barashada Qur'aanka iyo tafsiirkiisa.

Si aynu u ahaano qaar uu raadeeyo, Markaa aad fahamtid ayaad ku dhaqmaysaa.

QURAANKA OO LA KHATIMO BISHA RAMADAAN.

Nebiga NNKHH iyo Jibriil bisha Ramadaan Quraanka ayey subcin jireen, hadaba iyadoo inoo ah tusaale fiican oo ku dayasho mudan, hadana bal aan wax ka tilmaano sidii kuwii inaga horeeyey ee khayrka tusaalaha inoogu ahaa ay Quraanka u akhriyi jireen.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Waxa nebiga axaadiis kaga soo arooray inuu diidey in quraanka lagu akhriyo wax ka yar sadex casho.

"Cabdulaahi bin Camar ayaa yidhi: "Rasuulku wuxu I amray in aanan Quraanka ku akhriyin mudo ka yar Sadex [habeen].

" Riwaayad Aabuu Dawuud weriyey wuxu yidhi; "Ma fahmayo[quraanka] Qofkii ku akhriya sadex berri wax ka yar".

~ Laakiin culimadu waxay yidhaahdeen taasi waa qofka caado ka dhigta inuu Quraanka mar kastaba sadex habeen ka yar ku akhriyo, laakiin hadii ay jiraan munaasabado khayrku badan yahay, iyo goobo ajri fara badan laga helayo waxa banaan in lagu akhriyi karo quraan intaa in ka yar, Sidaa daradeed ayaa Culimo badan oo muslimiintii hore ka mida laga sheegay inay quraanka ku akhri jireen bisha Ramadaan intaa in ka yar.

Tusaale:-

 # Khaliifkii saddexaad ee muslimiinta Cuthman Bin Cafaan Wuxu ahaa mid habeenkii odhan dadaala oo tukada,ilaa la sheegay inuu Quraanka oodhan habeenkii hal Rakcad ku tukan jirey. " eeg taariikhda madiina ee ibn shayba".

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

 # Taabiciga Qataada wuxu Quraanka ku khatimi jirey hal asbuuc, markay Ramadaan soo gasho wuxu ku khatimi jirey, sadex habeen, marka Tobanka danbe ee Ramadan yimaado wuxu ku khatimi jirey haben kasta.

 # Saxaabiga Ubaya Bin Kacab wuxu Quraanka ku khatimi jirey Sideedeed habeenba hal mar. "eeg muqadamada Tafsiirka ee Ibn kathiir".

 # Taabiciga Ibraahim Anakhaci ayaa yidhi "Calqama wuxu Quraanka ku khatimi jirey shan habeen. " eeg fadliga Quraanka ee faryaabi".

Kuwaasi waa Culimadii hore ee Muslimiinta ee ku dayashada mudnaa, waxay tusaale nool inoogu yihiin Quraanka akhriskiisa bisha Ramadaan.

HABEENKII OO QURAANKA LA AKHRIYO.

Habeenkii in Quraanka lagu soo jeedo ayaa ka fadli badan maalintii, waxan taa ka qaadan karnaa in jibriil nebiga habeenkii quraanka la subcin jirey, waxa kale oo jira in quraanku odhan doono marka uu saaxiibkii u doodayo 'rabiyow waxan ka celiyey hurdadii habeenkii ee iiga ergo aqbal".

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

5. SADAQADA IYO RAMADAAN

Sadaqadu waa shey qaali ah oo kamida waxyaalaha illahey loogu dhawaado, waxa sadaqadu faaiido weyn u leedahay qofka bixiya oo alle agtiisa kaga helaa ajar iyo darejo, sidoo kalena waxey wax u tareysaa qofkii baahnaa ee la siiyey, kaasoo ay ka daboosho baahidii uu qabey ama wax uga tarto in uun.

Illaahey SW iyo rasuulkiisuba NNKH wey inoo sheegeen, wuxu rabbi quraanka SW inoogu sheegey suurada al baqara aayada 254 < kuwa xaqa rumeeyoow bixiya waxaan idinku arsaaqney..>, rasuulkuna NNKH wuxuu xadiis ku idhi < sadaqadu waxey damisaa dambiyada sida biyuhu u damiyaan dabka..> waxa wariyey tarmidi oo idhi waa xadiis xasan ah.

Sadaqadu waa sunne Bisha Ramadaan iyo qeyrkeedba, lakiin fadliga bishan darteed waxa la inoo suneeyey in aan Sadaqada bixino, gaar ahaan in dadka sooman in la affuriyo, taas oo nebigu ku sheegay in ajrigii Qofka sooman mid la mid ah lagu helayo, iyadoo aan waxba laga nusqaamin ajrigii kan la affuriyey, Nebbigu NNKH wuxu xadiis ku yidhi:- "Qofkii ambabixiya mid duulaya, ama xaaji, ama reerkiisa u sii

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

ilaaliya, ama affuriya mid sooman, wuxu leeyahay ajarkiisii mid la mid ah, iyadoon ajarkoodii waxba laga nusqaamin".

FAAIIDADA XADIISKA.

 # Qofka sooman oo la affuriyo waxa lagu helayaa ajarkiisii mid la mid ah sida xadiiskani inoo sheegay.

 # ilaahay ayaa ku amaanay duul sadaqo la baxay oo aan wax abaal ah iyo mahdnaq midna aan ku dooneyn, waxa keli ah ee ay ku doonayaan uu yahay weji ilaahay bes, siduu illaahey SW ku sheegey suurada al insaan aayadeeda sagaalaad.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

6. DUCADA IYO RAMADAANTA:-

Ducadu waa cibaadooyinka Ilaahay loogu dhowaado kuwa ugu fadliga badan. Nebiga SCW waxa ka sugnaatay inuu yidhi:- "Ducadu iyadaa cibaado ah".

Alle waa jecel yahay addoonka baryada badan, ee had iyo jeer ducaysta, halka dadku ay qofka ku nacaan baryada badan, waaba kuwa ku maahmaaha "Baryo badan iyo bukaan badanba waa laysku nacaa".

Dhalxe binu cubeydi llaah (r.c) waxaa laga warinayaa in uu nabiga (s.c.w) ahaan jirey markuu bisha arko mid yidhaahda:

(Allaw {bisha} noogu dul dhali ammaan iyo iimaan iyo nabadgalyo iyo islaamnimo, {bilyahay} rabbigey iyo rabbigaa waa Allaah, bil hanuun iyo khayr). Ducadu waa mid ka mid ah waxyaalaha muujiya kelinimada iyo jiritaanka Ilaahay.

Ducadu waa shay abuur ah, oo aadanaha iskaga abuuran, mulxidka aan Ilaahay rumaysnayn, ka mushrigga ah iyo ka gaalka ahiba marka ay xaalad halis ah la kulmaan si doonistooda ka baxsan ayuu dareenkoodu ilaahay keligii ugu jeestaa oo uu baryaa, waa tajaarib sugan oo dhacdooyin aan tiro lahayn laga hayo.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Ducadu waa waranka dhugta badan ee ka la dulmiyey aanu marna ka maarmi karin.

AHMIYADA DUCADA BISHA RAMADAAN.

Aayadaha suuratal Baqarah ee 183-187 waxay ka hadlayaan Soonka iyo axkaamtiisa, aayadda 186aad in kastoo ay aayadahaas Soonka ku dhex jirto, haddana waxay ka hadlaysaa mawduuc ka gedisan soonka, waxay ka hadlaysaa ducada, munaasibadda halkan loo soo dhex geliyey feker badan dabadii waxaan ku soo ururiyey laba arimood.

1: Ahmiyadda ay ducadu leedahay bisha Ramadaan dhexdeeda oo la muujinayo.

2: Ujeedada Soonka loo jideeyey waxa ugu horreeya in qofka soomani kasbado Alle ka-cabsi, Alle ka-cabsigana waxa aasaas u ah caqiido saxan, aayadduna waxay caddeynaysaa qayb ka mid ah tawxiidka, oo ah keliyeysiga Alle kelida ku yahay xaqa baryada, iyadoon cidna loo sii marin.

DUCADA LA AQBALLEY.

Ogsoonoow ducada la aqbalay waa sadex nooc:-

1: In markaad ducaysato Alle kaa aqbalo oo aad raadkii ducada aragto.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

2: In Allaah ducada kaa aqbalay, hase yeeshee dhibta ku haysata ama khayrka aad codsanaysay wax aan ahayn laguu geliyo, sida in dhib kugu soo socotay lagaaga xijaabo ama khayr kale lagugu siiyo.

3: In Alle kaa aqbalo, hase yeeshee aanad raadkeeda markiiba arag ee aakhiro ajarkeeda laguugu kaydiyo dibna laguugu dhigo.

Ka fogow waxyaalaha ducada lagu celiyo, ducadaada la raadso wakhtiyada ducada la aqbalo, xaaladaha lagu aqbalo, aadaabta ducadana baro.

Ha ka daalin ducada, hana quusan, Ilaahayna bari adigoo ku kalsoon in lagaa aqbalayo.

Walaalayaal aynu ku dadaallo ducada, aynu ilaahay waydiisano wanaag oo dhan, mid adduunyo iyo mid aakhiro, aynu ka magan gallo shar oo dhan mid hore iyo mid danbeba, Ilaahay ducadeena ha aqbalo, denbigeena ha dhaafo, caafimaad taam ah iyo camal toosan hayna siiyo, khayr dhammaantiina hayna waafajiyo maalmahan barakaysan ee Ramadaan.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

7. ICTIKAAFKA IYO RAMADAANTA.

Ictikaafku dhinaca luqada carbeed waa "Shay nafta lagu dul xabiso oo aan laga dul tegin".

Dhinaca shareecada wuxu noqonayaa "Masaajidka oo nafta lagu xabiso,adoo uga jeeda niyo cibaado ilaahay loogu dhowaanayo".

Ictikaafku waa Mashruuc ku sugnaaday kitaabka quraanka ah, Sunnada Nebiga NNKH iyo kulanka muslimiinta.

Kitaabka waxa ilaahay yidhi: "Ha BaashirinaDumarka [Hala mucaamaloonina] idinkoo masaajidda ictikaaf ku ah".

Sunnada Nebiga NNKH : "Wuxu ahaa[Nebigu nnkh] mid ictikaafa tobanka danbe ee Ramadaan ilaa uu geeriyoodey, isaga ka dibna Dumarkiisii ayaa ictikaafi jirey".

Kulanka muslimiinta:

Ibn Mundir kitaabkiisa Ijmaac wuxu yidhi: Waxay isku waafaqeen in aan ictikaafku ahayn waajib in qofku naftiisa ku waajibiyo maahee[eeg ijmaac ,juska 1aad ,bogga:50, Daabaca 1aad ee 2004, soo saaraha: Daarul Muslim].

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

WAKHTIGA ICTIKAAFKA.

Ictikaafku wakhti kasta waa mashruuc ramadaan iyo qayrkeedba, wuxuuna ku xasili karaa xataa saacad aad masaajidka fadhiisatid oo niyootid ictikaaf , mudo xadidan ma laha, laakiin nebigu labaatan casho ayuu ictikaafay inta ugu badan ee la ogyahay.

WAKHTIGA ICTIKAAFKA RAMADAANTA.

Qofkii doonaya inuu maalin ictikaafo, ama tobanka danbe ee Ramadaan, wuxu masaajidka gelayaa inta aan qoraxdu dhicin maalinta labaatanaad, wuxuna ka baxyaa maalinta sodonaad marka qoraxdu dhacdo.

SHURUUDAHA LAGA RABO ICTIKAAFAHA.

1: Inuu muslim yahay, qof gaal ah kama ansaxayo.

2: Inuu caqli fayow yahay, qof dhiman ama waalan kama ansaxo.

3: Inuu qaan gaadh yahay, qofka garaad wax kala saaraya leh wuu u ansaxayaa.

4- Inuu daahir ka yahay jinaabo, dhiig caado ama dhalmo.

5-Gabadha la qabo wa inuu ninkeedu u ogolaado.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

SHURUUDAHA LAGU GALO ICTIKAAFKA.

1: In lagu ictikaafo masaajid, weliba jimcaha laga tukanayo si aan qofku ugu baahan inuu jimce soo tukado.

2: Inuu masaajidka ku negaado oo aanu ka bixin, masaajidka lagama bixi karo , dan adag oo loo baxo mooyee sida wax cunis , dhaqtar loo baahdo, iwm.

3: In la soomo, qofka ictikaafaya waxa loo shardiyaa inuu soomanaado,mad'habka xanafayida iyo maalikiyada ayaa shardi ka dhigay soonka, halka mad'habka shaaficiya iyo xanbaliyadu aanay shardi ka dhigin soon, waa ictikaafka ka baxsan bisha Ramadaan, laakiin ictikaafka Ramadaan way isku waafaqsan yihiin inuu qofku soomanaado.

AADAABTA ICTIKAAFKA.

1: Inuu ilaahay qaabilsiiyo qalbigiisa.

2: Inuu cibaadada badiyo sida salaada, quraanka, ducada , xuska alle , ku saliga nebiga iwm.

3: In gabadhu isku asturto meel ka fog indhaha ragga, laasimtona adaabta wanaagsan ee haweenka laga rabo, sida codka oo la gaabiyo.

4: Inuu yareeyo bix bixista wixii aan daruuri ahayn.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

5: Inuu wakhtiga cibaado uga ka faa'iidaysto.

6: Inuu yareeyo hadlka aan cibaadada ahyn.

MAXAA U BANAAN ICTIKAAFAHA.

1: Waxa u banaan inuu wixii dan ah ee lama huraan ah u baxo isagoo soo gaabinaya.

2: Inuu soo booqan karo qof buka.

3- Inuu haweenaydiisa guriga gaadhsiin karo, haduu u baqayo.

4: Inuu seexan karo xiliga uu u baahdo, qubaysan karo, is nadiifin karo, isagoo ilaalinaya nadaafada masajidka.

MAXAA U BURIYA ICTIKAAFKA.

1: Gaalnimo(ilaah baan ka magan galee).

2: Niyadii ictikaafka oo uu gooyo.

3: Galmo.

4: Caqliga oo qofka ka taga, ha waasho ama ha sakhraamee.

5- Dhiiga caadada ama dhalmada oo gabadhii ku yimaada.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

8. LEYLATUL QADRI IYO RAMADAANTA.

Laylatul Qadri waa habeen fadli badan oo ku jira Tobanka danbe ee Ramadaan gaar ahaan habeenada tiradu is dheertahay sida 21,23,25,27,29.

Habeenkan waxa ilaahay kaga war bixiyey suurada Al-Qadar wuxuna yidhi:

"Waxanu soo dejiney[quraanka] habeen wax la qadaro, ama habeen qiima badan, ma garanaysaa waxa habeenka qadrigu yahay? Habeenka qadrigu wuxu ka fadli badan yahay kun bilood[83 sanno &4 bilood] malaa'igta ayaa soo degta [habeenkaa] iyo malaku jibriil.[dhulka ayey marayaan iyagoo booqanaya oo diiwaan gelinaya dadka cibaadaysanaya] waa habeen nabad gelyo ilaa waagu beryo, ama adoomaha ayey salaamayaan ilaa waagu ka beryo".

CALAAMADAHA LAGU GARTO LEYLATUL QADRIGA.

Laylatul qadriga wuxuu leeyahay calaamado lugu garto, waxaana kamid ah:

1.Waa habeen jawi wanaagsan leh dabayshana ay daggantahay:

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

(Ibnu cabbaas (r.c) wuxuu yir: rasuulkii Alle (s.c.w): laylatul qadriga waa habeen sahlan, oo furan, kulayl ma aha qabowna ma aha, subaxdeeda waxay qorraxda soo dhalan iyadoo daciif ah (sidii hore ka taag daran) oo guduudan.)

Waa habeen daganaanshaha iyo xasiloonida ay malaa'igta lasoo dagaysa leh, oo ruuxa wuxuu dareemi qalbi dagani iyo laab furni iyo cibaadadoo u dhadhanta si uuna habeenada kale ahaan jirin. (macnaha guud, kafiiri: saxiixu fiqhu-sunnah, mujalladka 2aad, bogga: 134).

2.Waa inay subaxnimada habeenkaas qorraxda soo dhalato iyadoo saafi ah oon shucaac lahayn.

(Ubayyi binu kacab (r.c) waxaa laga warinayaa inuu rasuulkii Alle (s.c.w) yiri: Subaxnimada laylatul Qadriga waxay qorraxda soo dhalan iyadoon shucaac lahayn, iyadoo baaf oo kale ah, ilaa ay kor u soo kacdo).

SHARAFTA HABEENKAN LEYLATUL QADRIGA.

Sharafta habeenkan wax inagaga filan in ilaahay qur'aanka soo dejiyey,quraankaas oo Aduunyada oo dhan hanuun iyo raxmad u ah, cidii ilaahay waafajiyo.

Sharafteeda waxa ka mid ah in ilaahay ku sheegay Habeen barakaysan"Waxan soo dejiney[Quraanka] habeen barakaysan".

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Habeenkan waxa la inoo jideeyey in aan la nimaadno salaad habeenkii la tukado,iyo cibaado, qofkii habeenkan Qadriga salaatu layl tukada isagoo rumaysan balanqaadka ilaahay ,ajrina kaga sugaya waxa loo qorayaa ajri ka badan kun bilood sida aayadu inoo sheegtay, waxana loo dhaafayaa denbigiisii hore.

Culimada selefka qaarkood waxay yidhaahdeen qofkan waxa loo qorayaa, soon iyo Salaad ka badan kun bilood inuu la yimi sidaa waxa laga sheegaa imaamka weyn ee Shaafici.

Hadaba in habeen keliya oo aad dhawr saacadood salatu layl tukatey laguugu qoro ajri ka badan dhawr iyo sideetan sano qof ilaahay caabudayey oo aan mar keliya caasiyin, waa qiime intee leeg?

Ilaahay ayuun baa qiyaasi kara!

Waa habeen dhamaan wixii ilaahay sanadkaa fulinayo loo qaybiyo malaa'ik ta si ay ugu hawl galaan , sida quraanku inoo timaamay, habeenkan ayaa malaa'ikta lagu wareejiyaa shaqadii ay sanadkan fulin lahaayeen, haday tahay cida dhimanaysa, cida dhalanaysa, cida qani noqonaysa, cida faqiir noqonaysa, cida liibaanaysa , cida khasaaraysa iwm.

Sidaa ay aayada quraanka ahi inoo sheegaytey : " waa habeen maalaa'ikta Raxmadu samada ka soo degto, waxay habeenkaas oo

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

dhan wareegayaan dhulka iyagoo diiwaan gelinaya dadka cibaadada gudanayaa, Malaa'iktan waxa hormuud u ah malaku jibriil, iyagoo dhulka usoo degaya khayr iyo bushaarona wada. "

Qofkii habeenkaa malaa'iktu ugu timaado isagoo khayr iyo cibaado ku soo jeeda ama samaynaya insha alaah waxay u diiwaan gelin doonaan inuu habenkaa khayrkisii la kulmay.

malaa'iktu waxay hawshan soo gabagbeeyaan ilaa waaga subaxu ka dilaaco oo salaada subax la tukado , sida suuradu shegtay.

HABEENADA UU KU JIRO LEYLATUL QADRIGU.

Waxa Axaadiistu inoo sheegtay inuu Habeenkani ku jiro, tobanka habeen ee

Ramadaan ugu danbeeya, gaar ahaan habeenada tiradu is dheer tahay ee 21,23,25,27.

Sidaa waxa inoo sheegaya xadiiska nebigu yidhi: "Rasuulku NNKH wuxu yidhi: ku dadaala habeenka Qadriga tobanka danbe ee Ramadaan ee kisiga ah <aan isku buuxin ama tirada kala dhiman tahay>

Waxa jira riwaayado si gaar ah u sii sheegay todobada danbe ee Ramadaan sida xadiiska Rasuulku NNKH wuxu yidhi: " waxaan arkaa

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

in riyadiinii isku raacday todobada danbe, qofkii ku dadaalayaa ha ku dadaalo Todobada danbe".

Hadaba habeenkan waxa loo qariyey si dadku u dadaalaan dhamaan tobanka danbe ee Ramadaan, gaar ahaan habeenada kisiga ah, sidaa ayaa daliilku inoo sheegay, faa'iidada ku jirtaana waxay tahay in ay kala baxaan qofka habeenkan khayrka badan qiimaynaya iyo qofka aan ku dadaalayn, waayo hadii la sheego qof kastaaba intuu iska fadhiisto ayuu habeenkan uun soo kici lahaa oo salaatu layl isku mashquulin lahaa.

Waxa culimadu si aad ah isugu khilaafeen inay habeenkan si gaara u tilmaamaan iyagoo daliishanaya calaamado iyo tirooyin nebigu si gaar ah u sheegay, khilaafkoodu wuxu gaadhaa ilaa afartameeyo qawl, laakiin in habeenkan si gaar ah loo cayimaa waa mid aan la rumaysan Karin waayo waxa la inoo sheegay in lagu qariyey tobanka danbe, waxana xusid mudan in aad ogaato in habeenku guurguuro oo uu sanadba habeen ka galo tobanka danbe ee Ramadaan, sidaa waxa sheegay Xaafidka Ibn Xajar Al casqalaani kitaabkiisa Fatxu Albaari [juska 4, bogga 266,madbacada Daarul macrifa], wuxu yidhi: " Qawlka u Xooga badan waa inuu ku jiro Tobanka danbe , weliba waa inuu guurguuro, sida axaadiista laga fahmayo."

DUCADA LEYLATUL QADRIGA.

Qofka habeenkan ilaahay waafajiyo waxa jira duco nebigu SCW uu caa'isha u sheegay inay ku ducaysato.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Caa'isha waxay tidhi, waxan Rasuulka NNKH ku idhi " hadii aan ogaado habeenkan maxan idhaahdaa?,

wuxu yidhi: Waxad tidhaahdaa: "ilaahoow adigu waxad tahay caffis badane , caffiskana waad jeceshahay, ee I caffi".

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

9. SEKAATUL FIDRI IYO RAMADAANTA.

- Sekadu waxey ka mid tahay Arkaanta islaamku ku taagan yahay ee shanta ah, Rasuulku wuxu yidhi : "Islaamka waxa lagu dhisay shan, 1. ka markhaati kaca in aan ilaah xaq lagu caabudaa jirin ilaahay mooyee iyo ka markhaati kaca in Muxamed 'scw'yahay Rasuulkii uu soo diray, 2. Salaada oo la tukado, 3. Bisha ramadaan oo la soomo, 4. Zakada oo la bixiyo, 5. Xajka oo la guto ". Waxa weriyey Bukhaari iyo muslim.

Qofka Muslimka ahi marka uu dhammeeyo soonka Ramadaan, waxaa laga rabaa in uu bixiyo sakaatul fidri, haddii uu awoodo.

Awooddaasi ma aha in uu hodan ahaado, ee waa in uu haysto wax dheeraad ka ah masruufka naftiisa iyo ehelkiisa maalinka ciidda ah.

YAA LAGA RABAA SEKADA.

Sakaatul fidriga waxaa laga rabaa dadka oo dhan, rag iyo dumar, caruur iyo ciroole.

Ibnu Cabbaas(rc) waxaa laga weriyey in uu yidhi: " Rasuulka ilaahay (SC) waxa uu faral yelay sakaatul fidri, iyada oo qofka soonkiisii ka daahirinaysa gefkii iyo dhacdhicii intii uu soomanaa, Cuntana u ah masaakiinta, Ruuxii bixiya sallaada ka hor waxay u tahay Sakko la

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

aqbalay, Ruuxii bixiya sallaada kadibna waxa ay u tahay Sadaqo ka mid ah sadaqooyinka". Waxaa Xadiiska Wariyey Abuu Da'uud, Sheekh Albaanina waxa uu yidhi waa Xadiis Xasan Ah.

WAKHTIGEE WAAJIB TAHAY EE LA BIXIYAA SEKADA.

Sakaatul fidri, waxa ay waajib noqonaysaa qorraxdu marka ay dhacdo maalinta Ramadaanka ugu dambaysa, waxaana la bixin karaa ilaa inta salaadda ciidda laga aadayo.

Salaadda haddii la tukadana, wakhtigeedii wuu dhammaaday waxa ayna iska noqonaysaa sadaqo caadi ah, sida xadiiska sare ku cad.

MAXAA LA BIXIYAA SAKADA.

Nebigu scw waxa uu faray in la bixiyo hal saac oo ah cuntada deegaanka, sida qamadida, bariiska, burka, iyo wixii la mid ah (deegaanada Soomaalida).

Saacu waa afar mud, meesha mudku yahay inta ay qaadaan laba sacab oo dhexdhexaad ah, Qof ayna sacabadiisu weyneyn yareyna, haddii inta uu labadiisa sacab isku qabto uu ka buuxiyo bariis afar jeer, waa saac, Kiilo ahaan waxaa lagu qiyaasaa 2.5 ilaa 3 kiilo inta u dhaxaysa, waxaana badbaadadu ku jirtaa in saddex kiilo la bixiyo, si shakiga looga baxo, Waana sida ay goysay hay'adda fatwooyinka ee

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Sucuudigu, Waxaa khilaafka keenay laba sacab oo bur ahi la mid ma aha laba sacab oo bariis ama galleey ah.

QOFKU YUU KA BIXINAYAA SEKADA.

Qofku waxa uu ka bixinayaa naftiisa iyo inta nafaqadoodu ku waajibto ee uu masruufo, sida ilmihiisa, xaaskiisa iyo waalidkiis.

Qof aan masruufkiisu waajib kugu ahayn waad ka bixin kartaa sakaatul fidriga laakiin waa in uu ogyahay kuuna ogolaado.

LACAG MALAGU BIXIN KARAA SEKADA.

Culumada Islaamka intooda badani waxa ay qabaan in aan lacag ahaan lagu bixin Karin, Laakiin, waxaa jira culumo qaba in ay bannaan tahay haddii dantu kallifto.

Tusaale ahaan, haddii qofka deegaankiisa ayna joogin masaakiin uu cuntadii siiyo, waa la ogol yahay in uu lacagta bixiyo, si masaakiin meel kale joogta cunto loogu gado, Laakiin lama ogola in miskiinkii lacagta la siiyo.

Qiimaha lacagtu waxa ay ku xidhan tahay hadba meesha qofku joogo, waana lacag goysa ilaa 3 kiilo oo cuntada deegaanka ah.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

XILIGEE UGU FADLI BADAN TAHAY IN LA BIXIYO SEKADA.

Sidaan sheegnay, waxa ay waajib noqonaysaa qorrax dhaca maalinta Ramadaan ugu dambaysa, afurka kadib, Waxaa se ugu fadli badan in la bixiyo subaxa ciidda salaadda ka hor.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

10. CIIDA RAMAADANTA.

Nabigu (CSW) waxa uu yidhi (QOOM KASTABA WAXA UU LEEYAHAY CIID ANAGANA CIIDAYAGU WAA TAN). Waa xadiith saxiix ah.

Hadaba Nabigu (CSW) waxa uu si gaar ah u tilmaamay labadaan ciidood ee kala ah Ciida Fidriga iyo Ciida Adxada sababtoo ah muslimka waxa ka xaaraan ah in ay gaalada shabahaan oo ay ku shabahaan wax u khaas ah gaalada hadii ay tahay cuntada iyo hadii ay tahay dharxidhashada, iyo cibaadadaba.

Hadaba muslimiintu waxay kaliya oo ay leeyihin laba ciidood oo kaliya ciida fidriga iyo ciida adxada.

Anas (RC) waxa laga soo weriyay in uu Nabigu (CSW) yimid madiina tiiyoo reer madiina laba maalmood ciyaaran (Nabigu (CSW) waxa uu ku yidhi:- " waa maxay labadaan maalmood, waxayna ugu jawaabeen waxa labadaan maalmood aanu ciyaari jirnay wakhtigii jaahilnimada, Nabigu (CSW) waxa uu ku yidhi illaahay waxa uu idinku badalay labadaan maalmood kuwa ka khayr badan maalinta adxiyada iyo maalinta fidriaga)." Sunan Abi Daa'uud.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

SALAADA CIIDA.

Culumada badhkood waxay ku tageen in ay waajib tahay in la tukado kuwaasi waa xanifyada, Ibnu Taymiya waxa uu doortay in uu Nabigu (CSW) laasimay marnana ka tagin salaada ciida waxanu xujo ka dhigtay (U TUKO RABIGAA OO GOWRAC) salaada ciida tuko ka dibna gowrac adxiyada.

Nabigu (CSW) waxa uu amray in ay dumarku ka soo baxaan guryahooga si ay uga qayb galaan salaada ciida, Culumada badhkoodna waxay yidhaadeen waa (Fardul kifaaya) waa shay hadii badh ka mid ah umadu ay la timaado inta kale laga dhaafayo, qolo kale oo sadexaadna waxay yidhaadeen waa suna la adkeeyay sidaa waxa aaminsan mad-habta maaliki iyo shaafici waxay xujo ka dhigteen xadiiskii Acraabiga waxa ka mid ahaa Illaahay in uu adoomihiisa ku waajibiyay shan salaadood.

TIRADA SALAADA CIIDA.

Cumar waxa uu yidhi Salaada Ciida Adxada waa laba ragcadood laba ragcadood oo dhamaystirin oo lahayn gaabin, Abi Siciid (RC) waxa laga soo weriyay in uu Rasuulku lahaa marka uu u soo baxo ciida adxiyada iyo ciida fidriga waxa ugu horeya ee uu qabtaa waxa uu ahaa SALAADA.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

TAKBIIRTA SALAADA CIIDA.

Takbiirta Ragcada ugu horeysa ee ciida waa Todoba ka tanbena waa shan qiraa'aduna way ka danbeysaa labadoodaba.

IYADA OO LASOOMAN YAHAY HADII LA OGAADO INEY CIID TAHAY.

Marka iyadoo la sooman yahay la ogaado in ay tahay ciid soonka waa la jebinayaa, waayo maalinka ciida soonku waa xaaraam sidaan hore u sheegney.

- Cumar binu Anis (RC) waxa uu ka soo weriyay kuwa ka mid ah ansaarta in ay yidhaadeen waxa naga qarsoontay bishii shubaal waanu soonayna waxana maalintii danbe noo timi qolo socota ah Waxayna Nabiga (CSW) agtiisa ka qireen in ay shalay bishii arkeen Nabiguna (CSW) waxa uu dadkii amray in maalintii soonka la jabiyo oo ay berina iidaan.

Waxa sunne ah qofku in uu sii cuno intaanu gurigiisa ka bixin maalinta Ciidul Fidriga ah Timir tiro kara dhiman ah sida 3ama 5 ama wax ka badan laakiin waxa uu ku koobsan tiro kala dhiman.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

11. Fadliga Maalinta Carafa:

Maalinta Carafa waa maalinta ay xujeydu u diyaar garoobayaan inay istaagaan buurta Carafa, taas oo ka mid ah tiirarka xajku ka kooban yahay kan ugu weyn, oo la'aantii aanu xajku ansax noqonaynin.

Sidoo kale waa maalintii la dhamaystiray diinta Islaamka iyo nimcada uu Allaah (SWT) ku maneystay muslimiinta, iyadoo carafe la taaganyahay waxaa soo dagay aayado muslimiinta ugu bishaareynaya in diintoodii loo kaamilay, (dhamaystiray) Allana (SWT) uu diintaas raali uga yahay inay diin u ahaato.

Carafa waa maalinta loogu magac daray "maalintii mash-huudka",,

- waa maalinta qofkii sooma uu Allah (SWT) u dhaafayo denbigiisa labo sanno, sanadkii la soo dhaafay iyo sanadka soo socda, waa fadli aad u weyn oo ka yimid xagga Eebbe (SWT) ee naxariista badan, mudanna in laga faa'iideysto.

Maalinta Carafa waa maalin uu Eebe (SWT) uu ku dhaartay weynideeda Eebana kuma dhaarto ilaa wax qiimo weyn leh maahane, sidaa darteed ayaa waxaa laga fahmayaa maalinta carafo inay tahay maalin aad u weyn una qiimo badan.

- Rasuulka (scw) waxaa uu yidhi ducada waxaa ugu fadli badan ducada maalinta Carafa, wax la yidhaahdana waxaa ugu sii fadli badan waxaan aniga iyo Nebiyadii iga horreeyay ay yidhaahdeen oo ah:" Laa Ilaaha Illallaahu Waxdahu Laa Shariika Laha, La-hul-mulk-wa-la-hul-xamdu, Wa huwa Calaa Kulli Shey'in qadiir ".

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Nebiga (scw) waxaa uu soomi jiray maalinta sagaalaad ee Carafa (waa barri oo kale) ee bisha Dil-Xijja, sidaas darteed guud ahaan muslimiinta (aan xujeyda ahayn) waxaa loo jideeyay inay soomaan maalinta Carafa, ducadana badiyaan.

- Alle (SWT) ha inaga aqbalo Soonka, Salaadiyo Dhamaan Camalada wanaagsan ee aan la imaanayno maalmahaan barakaysan, guud ahaana Ummada Islaamka, gaar ahaana umadda Soomaaliyeed.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

12. Fadliga In Dadka Khayrka Loogu Yeedho:

Waxaa laga wariyey Abii Hurayra (Allaah ha ka raali noqdee) in uu Rasuulkii Allah (scw) uu yidhi:- "Qofka ku baaqa hannuun, waxa uu leeyahay abaalmarin la mid ah abaalmarinta ay helayaan cidda raacday [hanuunkaas] iyada oo taasi aanay abaalmarintooda waxba ka dhimayn, Qofka ku baaqa baadi waxa dushiisa ah dembi la mid ah dembiyada ciddii raacday [halowgaasi] iyada oo taasi aanay dembiyadooda waxba ka dhimayn."

SHARAXA XADIISKA:

Xadiiskani waxa uu isugu jiraa bushaaro iyo digniin labadaba, Waxaana uu ina tusayaa in haddii aad cid ugu yeedho Illaahay (swt in la adeeco waxasd helaysaa ajar (abaalmairn) la mid ah qofkaa aad ugu yeedhay Illaahay diintiisa iyada oo aan isaga & adigaba waxba laga nusqaaminayn ajarka, waxaana uu camalkaasi wanaagsani kuu soconayaa inta uu qofkaasi camal wanaagsan qabanayo.

Dhanka kale, haddii aad dadka ugu baaqdo halow ama baadi iyo in Illaahay (swt) la caasiyo, waxaa ku fuulaya dembiga cidda ku dayatay ee raacday halowgaasi, iyada oo aan dembiga qofnaba waxba laga nusqaaminayn.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

FAA'IIDOOYINKA XADIISKA:

 # Camal wanaagsan haddii aad dadka ugu yeedho waxad helaysaa ajarka cidkasta oo sameysay.

 # Camal aan wanaagsanayn oo baadi ah haddii aad dadka ugu yeedhana waxad helaysaa dembiyada ay galeen cidkasta oo sameysay.

 # Waxan ka faa'iidaysanaynaa xadiiskan fadliga in laga shaqeeyo diinta Illaahay (swt) dadkana loogu yeedho iyo in laga taxadiro xumaanta dadka loogu yeedhayo ama lagaaga dayanayo.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

13. NIMCADA ALLE & MAHAD-NAQIISA.

Qofka Muslinka ahi waxa uu yaqaanna in uu Ilaahay abuuray, arsaaqo, arrimihiisa oo dhanna uu maamulo, Sidaas awgeed ayaa qofka muslinka ahi waxa uu garanaya cidda koowaad ee gallad ku leh inuu yahay Rabbiga wayn.

Galladaha Rabbi ina siiyay ayaa waxa Qur'aanka ku sugan in ay yihiin kuwo aan tiro lagu koobi karin, qofku haddii uu isku dayo in uu tirayana uu daalayo isagoon kowba joogin.

Galladaha Rabbi inagu nimceeyey ayaa waxa kow ka ah Islaamnimo, Iimaan, Nabad gelyo, Caafimaad iyo qaar kaloo badan.

Dhanka kale qof kasta oo adduunkan ku uuman Rabbi waxa uu ku galladay nimcooyin u gaar ah, Sida:- Aragga, maqalka, xubnaha jidhka iwm.

Nimcooyinkaas ayaa inta badan waxa dareema qofka ay ka maqan yihiin, halka qofka haystaa aanu inbadan dhaadin, Haddaba si qofka muslinka ah galladahaa Rabbi siiyay ay ugu waaraan, sidoo kale uu Alle ugu kordhiyo ayaa waxa uu Islaamku waajib ka dhigay in qofku uu Rabbigii uga mahad celiyo nimcooyinka uu siiyay. Mahadnaqqa sababtiisuna waa in qofkuu uu helo nimcooyin kale, iyo in kuwii hore

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

uu u haystay ay ugu sii waaraan, sidoo kalana in dhibaatooyinka Rabbi kaga ilaaliyo.

Mahadnaqqa galladahu wuxuu leeyahay saddex tiir oo kala ah.

1: In qofku uu uu qiro oo uu rumeeyo in galladani ay ka timi Ilaahay SWT.

2: In uu Rabbi uga mahad celiyo carrabkiisa, galladana uu isaga kaliya u tiiriyo.

3: In gallaadaas Rabbi siiyay uu kaliya ku isticmaalo wax Ilaahay raalli galinaya.

WAXYAABO KAA CAAWINAYA MAHAD NAQA RABBI.

Ugu danbayn waxa jira waxyaabo kugu caawinaya in aad Galladaha Rabbi ka mahad celiso waxana ka mid ah.

1: In qofku ku ducaysto in Ilaahay garansiiyo mahad naqqa galladaha Rabbi.

2: In qofku xasuusnaado awoodda, kalinimada, dhamays tirnaanta, naxariista iyo dulqaadka Rabbi, iyo in Ilaahay yahay ka kaliya ee isagu addoomihiisa ku gallada nimcooyinka.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

3: In qofku aad ugu fiirfiirsado oo uu uga fekero galladaha aan la tiro koobi karin ee Ilaahay siiyay.

4: In qofku uu dareensanaado abaalka wayn ee aakhiro uu leeyahay qofka Rabbi uga mahad celiya galladaha uu siiyay, sidoo kalana uu ogaado ciqaabka uu leeyahay qofka ku gaalooba galladaha Rabbi ee ka mahad celin waaya.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

14. FADLIGA DANBI DHAAFKA:-

Waxa laga wariyey Cabdillaahi Ibnu Cabbaas inuu yidhi Nabiga Scw ayaa yidhi:- "QOFKA BADIYA DANBI DHAAF DALABKA ALLE HAMMI KASTA WUU KA DULQAADA, CIDHIIDHI KASTANA MEEL UU UGA BAXO AYUU U SAMEEYAA, WAXAANA UU WAX KA SIIYAA MEEL AANU KA FILAYN".

Sharaxa Xadiiska:-

 # Xadiiskan Nabigeenu Scw waxa uu innagu barayaa wado fudud oo aynu kaga baxno dhibaatooyinka ugu waaweyn ee adduunkan meel aynu ka marno aynu la'nahay ee ay ka mid yihiin werwerka, walbahaarka, murugada, cidhiidhiga nafta iyo daalka aynu ku daalnay sidii waxaynu cuni lahayn aynu u heli lahayn.

 # Sida uu Nabigeenu Scw xadiiska inoogu tilmaamay intaas oo dhan waxa aynu kaga bixi karnaa innaga oo danbi dhaaf dalabka badina oo ASTAQFIRULLAAH nidhaahna odhaahdaasi wax culaysa oo ay inagu tahayna ma jirto balse shaydaanka ayaan ogalayn inaynu nidhaahno oo markaynu bilawnaba wax kale inna xasuusinaya si aynu arrinta nolosheena muhiimka u ah u ilawno.

 # Hadaba qof kasta oo muslim ah waxa la gudboon inuu badiyo oo caado ka dhigto danbi dhaaf dalabka Alle haynoo fududeeyo'e.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Faa'iidada Xadiiska:-

*** In aan qofka banii Aadamka ahi danbi ka dhawrsanaan karin (Nabiyadda marka laga reebo).**

*** In Alle jecelyahay qofka in badan danbi dhaaf waydiista maadaama waxaas oo dhan uu kaga fududaynayo.**

*** In danbi dhaaf Alle la waydiistaa cidhiidhiga ka kor qaado qofka.**

*** In danbi dhaaf Alle waydiisto Murugada lagaga baxo.**

*** In qofka danbi dhaaf dalabka badiya Alle wax ka siiyo meel aanu filayn.**

*** In eragayga danbi dhaaf dalabku ee (ASTAQFIRULLAAH) sir weyni ku jirto.**

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

15. Qorshaha Maalinlaha ah Ee Qofka Muslimka Ah:-

"Waxa laga wariyey Ummi Salamah- Allah (swt) ha ka raalli noqdee - waxa ay tidhi: "Waxa uu ahaa Nebigu (scw) marka uu tukado Salaadda subax ee uu ka baxo, waxa uu odhan jiray: "Allahayow waxan ku weydiisanayaa Cilmi waxtar leh, arsaaqad wanaagsan & camal la aqbalo."Waxa soo saaray Muslim.

SHARAXA XADIISKA:

Xadiiskani waxa uu ina barayaa ahmiyadda nololeed ee qofka Muslimka ah uu leeyahay, waxana uu tilmaamayaa qorshaha maalinlaha ah ee qofku salaadda subax kadib uu ku talogelayo oo ah inuu illaahay (swt) weydiisto saddexdaasi shay oo dhammaan ah camalada qofka uu sameynayo ay hoos imanayaan.

Waa Cilmi waxtar leh, arsaaqad (quud) xalaal ah oo wanaagsan & camal Alle (swt) aqbalo.

Xadiisku waxa uu ina tusayaa inuu jiro cilmi aan waxtar lahayn iyo mid waxtar leh, waxana culimadu ku sharaxeen Cilmiga waxtarka leh ee anfaca leh inuu yahay kan qofka Illaahay (swt) u dhoweynaya ee uu ku baranayo dariiqa toosan ee Allaah (swt) loo maro & sidoo kale waxa anfacaya aakhiradiisa & adduunkiisaba.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Waxa kale oo ahmiyadda qofka Muslimka ah waxa ka mid ah oo uu u shaqeynayaa in Illaahay (swt) uu siiyo risiq wanaagsan oo xalaal ah.

Camalka la aqbalo, oo riwaayad kalena ku timid "camal wanaagsan" waxay culimadu ku sharaxeen in camalkasta oo qofku sameeyo aanu ahayn mid Illaahay (swt) aqbalo, Balse Illaahay (swt) waxa uu aqbalaa camalka loo sameeyo Alle dartii (ikhlaas) isla markaana lagaga daydo rasuulkii Alle (swt).

Sidaas darteed, ducadan oo ka mid ah dikriga joogtada ah ee la akhriyo subaxkasta waxay xadidaysaa hadafka maalinlaha ee qofka Muslimka ah leeyahay oo ah inuu ku helo arrimahaas saddexda ah ee wanaagsan.

FAA'IIDOOYINKA XADIISKA:

1: In ducadan la akhriyo subaxkasta salaadda kadib.

2: In qofka Muslimka ah uu xadido ah-daaftiisa, isaga oo Alle (swt) baryaya.

3: In Illaahay (swt) la weydiisto Cilmi waxtar leh, arsaaqad wanaagsan & camal la aqbalo.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

GABOGABADII.

Waxaa mahad iskaleh ALLAHA inoo ogolaaday inaan soo gaadhno dhamaystiranka buugeenii fadliga ramadaanta, walaalayaal Allaah waxaan waydiisanaynaa inuu inaga aqbalo soonka, salaadda, quraan akhriska, soo jeedka (salaatu laylka) iyo dhammaan cibaadada noocyadeeda kal duwan, iyo inuu inaga dhigo kuwo ka faa'iidaysta ramadaanka oo sababtiisa janada ku mutaysta, loogana yeedho maalinta qiyaame albaabka jannada ay dadkii soomijiray oo kaliya ka galaan (Baabu Rayyaan).

Wal-wal iyo walbahaar wuxuu usugnaaday ruuxa aan soomin bishan barakaysan isagoo kara ee wanaageeda qaar kamid ah aan horay u soo sheegnay, waxaan xusuusinayaa dadkaas towbadda iyo in ay ALLAAH wayne, usoo noqdaan, sidoo kale waxaa xaaraam ah bisha ramadaan dhexdeeda in cuntada laga ganacsado, loona kariyo dad muslimiin ah oo soonka ku waajibay, ruuxa sidaa yeela Allaah ciqaabtiisa ha iska jiro, sidoo kale ha ogaado xoolihiisa Allaah uma barakayn doono, haddii uuna towbad keenin, lacagta sidaa kusoo gashana waa xaaraam, nabigeenna (s.c.w) wuxuu inoo sheegay in Jidhkasta oo xaaraam ku baxa (ku kora) ay naar u xaqleedahay ama u haboontahay (in lagaliyo oo ay cunto),

Allaah ha ina ilaaliyo adduun iyo aakhiriba, hana inaga dhigo kuwo hadalka dhagaysta kiisa ugu fiicanna raaca, hana inugu daro adoomadiisa uu bishan barakaysan naarta ka xoraynayo, Aamiin yaa ALLAAH.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

TALO DHIIRIGELINEED.

Uhiili Naftaada.

Markaad tahay qof uu Alle (SW) ku abuuray kawnkiisan, isla jeerkaasna ku manaystay caqli waa in aad yeelataa Hami & Hiigsi. adiga oo aan cidna u daba fadhiisan inaad rumayso ahdaaftaada ha noqdaan kuwo aduun iyo dabcan kuwo aakhiro.

Waxa jira dad badan oo u noqda nolosha dhibanayaal. taasi waxaan ula jeeda in ay noloshooda ka dhigaan tu ku xidhan qorshe qof kale dajistay ama jid ruux kale jeexday si uu u maro dabadeedna siday jidkaa u socdaan uu kaga dhamaado meel aanay doonayn amaba aan la mahadin.

Waxa kaloo jira in badan oo aan noloshooda masuuliyad ba iska saarin. Tusaale waxaad in badan aragtaa qof waalidkiisa la nool isagoo da,diisu 20 jir kor u dhaaftay kana raba mariin & masruufba haddii uu ka waayana iska cadhoonaya!

Waxa jira iyaguna hablo badan oo dhalinyaro ah oo wax bartay in badana soo baranayay oo marka ay dugsi sare ama jaamacadda heerka koowaad shahaado ka qaataan sugaya uun in la guursado oo aan indho & dhago kaleba lahayn. Guurku waa muhiim lakiin se waa in aad si waafi ah uga fakartaa halkaad talaabada u qaadeyso iyo waxa kaaga horeeya.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Iyana waxaan meesha ka madhayn Rag inta ay reero dhistaan haddana iska hurda oo doonaya inay jiifka wax kasta ku helaan taasi oo ugu danbeyntii keenta burbur qoys amaba dayac ku yimaada ubadkooda.

Haddaba waa inaad cindiga ku haysaa in aaney xisaab la,aan waxba shaqeynin, hadday dhacdana aaney kusii waarin, wax wal oo mas,uul lagaaga dhigay waxay kusoo idlaadaan uun xisaab gaw lagu siiyo, haddii aanay jirin taasina waa jaantaa rogan oo makhluuq oo dhan xisaabaa u danbeysa. Haddii aanad naftaada xisaabin oo aanad u dhigin qorshayaal aad hadhaw ka shidaal qaadato ogow waxaad tahay dhibane ka mid ah dhibanayaasha nolosha iyo aakhiraba.

Haddaba akhriste u hiili naftaada adoo uga hiilinaya cibaadada & Alle ka cabsiga oo aad caadeysato, noloshaada iyo qorshayaashada oo aad qof kale ku xidho iyo wakhtiga malaayacniga kaaga dhacaya.

Turunturooyinka noloshu way badan yihiin lakiinse ogow inay yihiin casharo laguugu talo galey si aad wax badan u ogaato, kaligaana maahee qofkasta oo aduunkan ku dul uumanba wax buu la daala dhacayaa haba lakala badsadee.

Sida Loo Dhiso Hadafka:-

Ugu horrayntii su'aasha muhiimka ah waxa ay tahay.

Sideen ku xaqiijin karnaa go'aamada aan qaadano in ay noqdaan kuwa shaqeeya oo aan laga quusan muddo gaaban gudahood ?

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Hadaba waxaan isku dayayaa in aan ka jawaabo su'aashaan inkasta oo aan doonayo in su'aashu ay noqoto mid furan oo cidkasta ay ku soo kordhin karto aragtideeda ku aadan mowduucan si dadka oo idil xikmadooda loogawada faa'iidaysto.

Waxaan doonayaa in aan halkaan ku soo koobo 6 qodob oo aan isleeyahay waxa ay ka qayb qaadan karaan in ay qofka ka caawiyaan in noqdo qof go'aan leh oo wax hiigsanaya, hadaba waxa ay kalayihiin :-

1: Isku day in aad ogaato waxa aad ku wanaagsan tahay :

Waxaa muhiim in aad kala ogaato waxa aad ku wanaagsan tahay iyo waxa aad xiisaynayso in aad samayso, Waayo marmarka qaar waxaa dhacda in aad ka tagto wixii aad ku wanaagsanayd adiga oo raadinaya waxa aad xiisaynayo taasoo sabab u noqota in waqti badan uu halkaa kaaga lumo adiga oo aan ka gaadhin natiijo lataaban karo , Hadaba waxaa haboon in aad diirada saarto waxa aad ku wanaagsan tahay taasi ayaa ku dhaxalsiinaysa in ay kuu sahlanaato wadada aad umari lahayd guusha.

2: Go'aanso waxa aad hiigsanayso isla markaana Go'aamadaadu ha noqdaan kuwa macquul ah misana aad hanan karto, una samayso wakhti xaddidan (wakhto go'an) oo aad ku gaadho:

Waa muhiim in aad is waydiiso go'aanka aan qaadanayo ma yahay mid aan ka guul gaadhi karo ?

Mise waa mid ku dhisan xamaasad iyo riyo ?

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

3: Samayso Jadwal aad Raacdo:

Waxaa aad u muhiim ah qofku in uu samaysto jadwal wakhtiyaysan oo uu raaco waayo jadwalka wakhtiyaysan waxa uu kuu sahlayaa in aad la socoto hadba wixii isbaddel ah ee aad samaysay mudadi aad u qorshaysay in aad ku gaarto halkii aad hiigsanaysay, Islamarkaana waxaa kuu sahlanaanaysa in aad xakamayso wakhtigaaga, Hadii aad wakhtigaaga xakamayn kartana ogoow wax waliba waad maarayn kartaa , isbaddel lataaban karana waad la imaan kartaa.

4: Isku day in aad ka fogaato wax kasta oo sabab u noqon kara in uu burburo go'aankii aad qaadatay :

Tusaale hadii aad go'aansatay in aad wax barato iskuday in aad ka fogaato dadka aragtidoodu ay tahay in aan waxba labaran karin , waxba la noqon karin waayo dadka sidaa u fakiraya waxaa la arkaa go'aankii aad qaadatay in ay si xun kuugu fasiraan kadibna aad ka niyad jabto halki aad hiigsanaysay.

Sidoo kale hadii aad go'aansatay in aad balwad iska joojiso ugu horray waa in aad ka fogaataa wax kasta oo keeni kara in aad dib ugu laabato balwadii aad joojisay, Haday ahaan lahayd asaaxbti aad wadaagi jirteen balwada.

5: Raadi wax kasta oo keeni kara in ay kugu dhiiro galiyaan go'aanki aad qaadatay:

Hadaba waa muhiim in aad hesho wax kugu dhiiri galiya waxa aad hiigsanayso, waayo dhiiri gelintu waxa ay qofka siisaa in uu ku dhiirado

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

siduu u hanan lahaa wixii uu hiigsanayay, sidaa awgeed qofku waa in uu raadiyaa wax yaabaha sabab u noqon kara in ay ku dhiiri galiyaan go'aankii uu qaatay, Hadii ay noqon lahayd in aad la xidhiidhto dad aad isku aragti katihiin Go'aanki aad qaadatay oo talo amaba tusaalooyin aad ka hesho, amaba in aad baarto mowduucyada ku saabsan go'aanki aad qaadatay si aad halkaa uga hesho talooyin waxtar kuu leh amaba ku dhiiri galiya.

6: Dulqaad u lahaaw Naftaada:

Waxaa muhiim ah in aad ogaato marwaliba sidaad wax u qorshaysatay uma dhacayaan waayo mar marka qaar waxaa suurtagal ah in aad qaaddo waddooyin badan oo aan ku gaadhsiinayn halki aad hiigsanaysay, sidaa awgeed waa in aadan ka quusan go'aankaagii aad qaadatay balse hadii aad dareento culays iskuday in aad wax ka badasho habkii (qaabkii) aad u qorshaysatay in aad u marto halkii aad hiigsanaysay balse waa in aadan baddelin halki aad hiigsanaysay ee hadefkaagu uu ahaa, Hadiise ay dhacdo in ay wax iska baddelaan aragtidaadii ku aadanayd halki aad hiigsanaysay waxaa kuu furan in aad baddesho balse inta aadan isbaddelka samayn waa in aad sii qorshaysataa wax kale oo aad hiigsanayso maxaayeelay wakhtigu waa waa dahab haduu ku dhaafana sooma noqonayo sidaa awgeed adiga oo aan qorsho kale haysan ha iska furfurin go'aankaagii hore.

Shanta Arrimood Ee Ugu Waaweyn Ee Caqabadda Ku Noqda Ka Midho Dhalinta Fikirka Iyo Hal-Abuurka Qofka:-

 # Inta badan dadka doonaya in ay bilaabaan ganacsi ama shaqo kale oo cusub waxa ay la kulmaan dhibaatooyin fara badan oo qaar badan ku

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

qasba in ay qorshahooda ficil u rogi kari waayaan, ama shaqadooduba saqiirto inta aanay bilaaban ba.

Dr. Xasan A-Sacadi oo kormeere guud ka ah xarunta hal-abuura iyo hoggaaminta ganacsiga oo ka tirsan jaamacadda Malik Cabdalcasiis ee magaalada Jiddah dalka Sucuudiga ayaa sheegay in qaar badan oo ka mid ah mashaariicda fashilma ama turun-turrooyinka la kulmaa inta aanay bilaaban ay yihin kuwa ay ka hor yimaaddaan dhibaatooyin ay ugu mudan yihiin kuwan hoos ku qorani.

1: Aragi la'aan:-

Dr. Sacdi waxa sheegay in qodobkani uu yahay caqabadda in badan ka hor-timaadda qof kasta oo mashruuc qorshayanaya.

Dad badan oo maalgashadayaal ah ama shaqooyin kale curiyey rag iyo dumarba ayaa aan lahayn hiigsi waqtiga fog ah iyo qorshayaal waqti ku xaddidan iyo nidaam ay u dhigeen hab-sami u socodsiinta mashaariicdooda.

Qaar badan oo ka mid ah ayaanay ku keentaa in ay hawsha ay dib uga gurtaan iyaga oo badhtamaha u galay, waa waxa ay xal u waayayaan mushkiladaha aanay marka hore ku xisaabtamin ee ka hor imanaya.

2: Waxba ha ka baqan in fikirka lagaa xado:-

Sababta labaad ee uu digtoorku sheegay in ay caqabad ku noqoto dadka xilliga bilowga mashruuc ama ganacsi waa:-

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

*** Dadka oo inta badan hawlahooda bilaaba iyaga oo waabasho ku jirto ama aad isaga ilaalinaya in ay fikirkooda sheegaan oo dadka kale la wadaagaan, sababtuna waa cabsi ay ka qabaan in fikirkaas laga xado.**

*** Cabsida ay ka qabaan in fikirka cid kale ka xaddo ayaa caqabad ku noqota suuq geyntii fikirku u baahnaa iyo u bandhigista dadka maalgelin lahaa, waxa aanay taasi keeni kartaa in fikirkaas quruxda badani qofka ku dhex dhinto.**

3: Maalgelin:-

Maalgelinta mashruucu waa arrinta ugu dhibta badan ee ka hortimaadda qofka hal-abuuray fikir ganacsi, dhibtuna waxa ay ka taagan tahay dadka inta badan hal-abuurka la yimaadda oo ah dad aan iyagu lacagtii haynin ama aan gaadhin heer lacagta fulinta mashruucaa ku filan deyn ahaan lagu aamini karo.

4: Suuq-geynta:-

Dr. Sacdi waxa uu sheegay in haddii qofka fikirka hayaa waa in uu ku xisaabtamo muhiimadda ay leedahay suuqgeynta fikraddu, sidaa awgeed uu waqti iyo maskaxba geliyo sidii uu fikirkiisani inta uu bilowga yahayba dadka uga dhaadhicin lahaa, haddii kale waxaa khatar ku jira mustaqbalka mashruuciisa.

5: U ban bixid:-

Sida uu Digtoorku sheegay waxaa in badan dhacda in qofku uu fikirka ficil u beddelo balse aanu hawsha maamulista iyo ka midho dhalinta

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

mashruuca isagu qaban ee uu cid kale u xil saarto, taasina waxa ay ka mid tahay sababaha ugu badan ee mashruuca fashilaadda ku keenaya.

Talada ugu fiicani waa in qofku uu u ban-baxo shaqada uu isagu curiyey, waayo ma jirto cid kale oo sida uu u dareemayo ama u fahamsan yahay fikirkiisa ula fahamsani, mashruuc kastana fulintiisa iyo hirgelintiisa hore waxa ay ku fiican yihiin in qofka hal-abuuray uu maamulo.

Furayaasha Farxadda.

Waxa ugu qiimaha badan ee uu aadamuhu gaadhi karaa waxa weeyaan inuu ku sugnaado farxad iyo raynreyn, waqtigiisana ku qaato kalgacal iyo wanaag, si ay u noqoto mid ku reebta xusuus qurux badan noloshiisa inta ka dhiman.

Farxadda sideedaba tukaan laguma Iibiyo, qofna lagama xado, meel ala meel lagu tilmaamo ood kasoo helaysaana majirto, laakiin waxey ku xidhantahey adiga! Haa adigey kugu xidhantahey iyo hadba sidaad u wajahdo duruufaha nolosha ee kala duwan, hab dhaqanka aad la dhex joogtid umadda iyo jawaab celinta aad ka sameyso caqabadaha is daba jooga ah ee hadh iyo habeen kaa hor imanaya.

Haddaba, qormadan waxaynu ku eegaynaa dhawr qoddob oo hadaad laasintid kaa caawinaya inaad farxad iyo qalbi deganaan ku joogtid badiba wakhtigaaga .

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

*** Cabsida iyo Cibaadada Alle:- waa furaha farxada iyo liibaanta iftiin iyo aakhiraba, haddii aad noqoto qof Alle ku xidhan, cibaadadiisana ku dadaala, wuxuu farayna qaata wixii uu ka reebayna ka digtoonaada, waa hubaal wax kaa dhiman ba ma jirayaan, qalbigaaguna wuu xasilayaa oo miyaanad maqal Aayada Qur,aanka ah ee Alle (SWT) yidhi**

(Miyaaney Xuska Illahey qalbiyadu ku xasilin).

*** Ula dhaqan dadka si naxariis leh:- dhaqanka wanaagsan ee ay ka buuxdo naxariista iyo kal gacalku wuxuu siyaadiyaa iney kordhaan hoormoonada farxadu, markaa waa muhiim ah inaad ku dadaasho ajarna wuu kaaga socdaa.**

*** Asxaab wanaagsan raadso:- in aad la rafiiqdid dad wanaagsan waxey keenaysaa iney adna wanaaga iyo wax tarka kula jeclaadaan, agtoodana aad ka hesho farxad iyo raynreyn is daba jooga.**

*** Hadaf yeelo:- inaad wax hiigsato ood niyada ku heyso inaad meel sare gaadho waxey muhiim u tahey noloshaada waxeyna ku gaadhsiinaysaa heer farxadeed ood mahadiso.**

*** Ixtiraam Dadka Kale:- aadamuhu waa noole bulsheed kaligii inuu nolaadaana waa midaan surtoobeyn, haddaba hadaad daneynayso farxad waa inaad ku ogolaata dadka sida ay yihiin, tix galisaa go'aamadooda sheekadooda dhageysataa, si karaamo leh ula dhaqantaa, cidii aad gacan siin kartid aanad ka hagran "Waxa jira waxyaabo qof wax u ah adigana aan dhib kugu hayn" markaa intii awoodaada ah isku day inaad caawiso.**

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

*** Iska ilaali Cudurdaarka iyo eedaynta:- waa inaad waji furan ku qaabishaa guul darooyinkaaga cashar inaad ka qaadatidna isku daydaa, halka aad cidkale eed ku saari laheyd iney ka danbeeyeen guul darooyinkaaga.**

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

TODOBA ARIMOOD OO NAARTA LAGAAGA XOREYNAYO:-

In badan oo ka mid ah dadka ku nool aduunyada dusheeda, waxey adoomo u yihiin dunuubtooda iyo macaasidooda.

Waxey u xidhan yihiin naarta jahanama oo ay u rahman yihiin.

Lakiin waxa ka mida ah fadliga uu allaah'sw' adoomadiisa ku galadeystey & naxariista balaadhan ee uu allaah 'sw' khalqigiisa ku maneystey, in uu u yeelay asbaab ay kaga baxaan adoonimada ay dunuubtooda adoomo u yihiin.

In uu yeelay allah 'sw' arimo ay kaga xoroobaan u xidhnaanta ay u xidhan yihiin naarta jahanama, gaar ahaan bisha barakeysan ee ramadaan, rasuulku SCW wuxuu idhi illaahey SW adoomadiisa ayuu naarta ka xoreeyaa maalin kastoo ramadaana.

Waxaa la gudboon qof kasta oo muslim ah in uu naftiisa xusuusiyo in guusha dhabta ahi tahay " in uu naar ka badbaado yow-mul qiyaamaha & in uu helo nimcada allah 'sw' iyo janadiisa.

قال تعالى:

(فمن زحزح عن النار وأدخل الجنة ففد فاز ومالحياة الدنيا الا متاع الغرور.)

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

أيها المسلمون عباد الله

Waxeynu is xasuusin doonaa todoba arimood oo rasuulkeenu 'scw' si cad inoogu sheegey in cidii la timaada ilaahey 'sw' uu naarta kaga xoreynayo oo uu danbiyadooda u dhaafayo.

1. **SABABTA KOWAAD:-**

الإخلاص لله تبارك وتعالى:

In adoonku noqdo mid acmaasha, cibaadada & kheyrka uu sameynayo oo dhan mid uu illaahay daraadii usamaynayo,

لا يريد بها جزاء من غير الله سبحانه وتعالى

mid aanu ilaahey waxaan aheyn abaal marin kaga doonaneyn, oo ay isugu mid noqoto in ay dadku ku amaanaan & in ay ku dhaleeceeyaan acmaasha iyo cibaadada uu sameynayo, in agtooda mansilo & sharaf ku yeesho iyo in aanu helin midnaba.

قال نبينا صلى الله عليه وسلم فيما رواه البخاري " :لن يوافي عبد يوم القيامة بقول لا إله إلا لله يبتغي وجه الله إلا حرم الله عليه النار"

Wuxu yidhi rasuulku 'scw' adoonku haduu la tago maalinta qiyaame qowlu LAA ILAAHA ILA LAAH kalimatu towxiid wa kalimatu ikhlaas isaga oo ilaahey wajigiisa ku doonaya kalmadaa iyo kheyr kasta oo ka farcama wuxuu ilaahey ka xaaraam yeelaa naarta, adoonkaasi ma galo naar.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Waxa ka mid ah arintaa calaamadaheeda in adoonku mukhlis yahay iyo in kale oo u kala garan karo,

*** أنشاط في طاعة الله تبارك و تعالى:**

*** in uu ku dadaalo illaahay 'sw' adeecitaankiisa.**

*** وأن يحب أن لا يطلع على عمله الا الله:**

*** in uu ku dadaalo qarinta acmaashiisa wanaagsan oo aanu jecleysan in cid aan illaahey 'sw' aheyni ay ku aragto.**

متي يعلم العبد أنه من المخلصين؟

Goorma ayuu adoonku ogaan karaa in uu ka mid yahay kuwa niyadoodu saxsan tahay ee arimahoodu ilaahey 'sw' daraadii yihiin?

إذا بدل المجهود في الطاعة وأحب سقوط المنزلة عند الناس

Marka uu dadaalkiisa oo dhan uu ku bixiyo illaahey 'sw' adeecitaankiisa ee uu jeclaado in dadka agtooda darajo iyo mansilo toona in aanu ku yeelan.

Waayo adoonku Haduu jecel yahay in ay dadku amaanaan, in ay sharfaan, in darajo uu dhexdooda ku yeesho taasi waxey u dhowdahay in ay dhaawacdo ikhlaaskiisa oo acmaashiisa qaarkood uu u sameynayo si uu u gaadhi lahaa arimahaasi.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

أيها المسلمون عباد الله

2) SABABTA LABAAD EE ILAAHEY 'SW' ADOOMADIISA NAARTA KAGA XOREYNAYO WAA:-

إصلاح صلاة بإدراك تكبيرة الإحرام *

Waa inuu adoonku salaadiisa wanaajiyo oo uu ku dadaalo, waxyaabaha taasi ku imaneyso waxa ugu horeeya in uu ku dadaalo inuu gaadho takbiirta salaada lagu xidho, oo aan salaada laga hor xidhan.

قال نبينا صلى الله عليه وسلم (:من صلى لله أربعين يوما في جماعة يدرك تكبيرة الأولى كتب له براءتان :براءة من النار وبراءة من النفاق).

رواه الإمام الترمذي في السننه.

Waxa uu leeyahay rasuulkeenu 'scw' "afartan maalmood qofka salaada faralka ah jamaacada la tukada, isaga oo afartankaasi maalmood salaad kasta takbiirta lagu xidho ka gaadhayey, waxaa loo qoraa in uu laba arimood ka badbaadayo.

ARINTA KOWAAD: waa naarta in laga xoreeyo.

ARINTA LABAAD: waa nifaaq, oo arintaasi waxey daliil u tahay inuu qalbigiisa ku jirey imaan dadaalka noocaasi ah ku dhaliyey.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

أيها المسلمون عباد الله هذا والله فضل العظيم

Waa fadli aad iyo aad uweyn oo ay inala gudboon tahay in aynu nafaheena u faaruqino oo aynu waqti uyeelano.

Afartan maalmood salaadahood waa laba boqol oo salaadood.

Labada boqol ee salaadood ee aad jamaca la tukatey, ee takbiiratul ixraam ka gaadhey, waxey ka dhigan yihiin

مئتا خطوة إلى الجنة وعن النا

Laba boqol oo talaabo oo xaga janada aad uqaadey, xaga naartana aad ka fogaatey.

وهي سلعة غالية تستحق أن يبدل فيها الجهود

Waa arin aad iyo aad u qaali ah oo mudan in lagu bixiyo dadaal fara badan.

Waxyaabaha taa kaa caawin kara waxa ka mid ah :-

*** In aad naftaada ka fududeyso hawlaha aduunyo iyo mashaaqisheeda waa hadii aad dooneyso dadaalkaa in aad bixiso.**

*** In aad ilaahey 'sw' weydiisato in uu arinkaa kugu kaalmeeyo.**

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

*** In aad ka fogaato danbiyada ku dabraaya, ee kaa dabraaya dadaalkii aad aad kheyrkaa ku bixin laheyd & in aad ku dadaasho daacada, kheyrka iyo wanaagyada sabab unoqonaya in allaah 'sw' wanaaga noocaasi ah uu kugu hanuuniyo.**

أيها المسلمون عباد الله :-

3) ARINTA SADEXAAD ee uu illaahey "sw" adomadiisa naarta kaga xoreynayaa waa:

*** المحافظة على صلاتى الفجر والعصر لا سيما في الجماعة:**

*** In adoonku ilaaliyo labadaa salaadood, si gaar ah ahna u ilaaliyo.**

waa salaada subax oo hurdo ka horeyso iyo salaada casar oo hurdo ama cunto laga dhargaa ka horeyso, taas oo qofka caajiznimo ku rida.

Gaar ahaan marka labadaa salaadood jamaaco lagu tukado waxa uu ilaahey "sw" sabab uga dhigayaa in naarta lagaa xoreeyo.

قال نبينا صلى الله عليه وسلم فيما رواه مسلم في صحيحه " :لن يلج النار احد صلى قبل طلوع الشمس و قبل عروبها".

Wuxu yiri rasuulku'scw': "Naarta gali maayo adoon tukadey intaaney cadceedu soo bixin'waa salada subax' & intaney dhicin'waa salada casar."

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Arintani waxey ku imaneysaa labadaa salaadood inaad waqtigooda tukato, oo aad ku ilaaliso sunayaasha ka horeeya, oo sunaha ka horeeya ilaalintiisu waxey sabab unoqoneysaa in salaadahaa waqtigooda ku alaaliso.

ولهذا

wuxuu yiri rasuulku'scw : '

ركعتا الفجر خير من الدنيا وما فيها "رواه مسلم"

"Labadaa rakcadood ee sunaha ah ee ka horeeya salaada subax, waxey ka kheyr badan yihiin aduunyada mugeed iyo waxa ku dhex jira"

Wax allaale waxa dhex yaal oo aan iyaga aheyn ayey ka kheyr badan yihiin.

وقال نبينا صلى الله عليه وسلم "رحم الله إمراء صلى قبل العصر اربعا "رواه ابو داود وترمذي

" Illaahey 'sw' ha unaxariisto adoon, 'waa ducaa,u mina nabawiyi caleyhi salaam ama waa khabar ama waa war uu leeyahay' ilaahey ha unaxariisto adoon tukaday afar rakcadood salaada casar ka hor.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

أيها المسلمون عباد الله :-

4) ARINTA AFRAAD ee uu illaahey'sw' adomadiisa naarta kaga xoreynayaa waa:

* المحافظة علي أربع ركعات ظهر وبعده.

Dadka inta tukataa wey yar tahay, dadka badankooda waxa laga yaabaa in ay laba ka horeysiiyaan laba ka danbeysiiyaan,

وهذا وارد سنة النبي عليه الصلاة والسلام.

Taasi waa mid soo aroortey fadlina leh, lakiin waxaa kasii fadli badan oo ilaahey "sw" naarta kaaga xoreynayaa, in aad afar rakcadood oo sune ah ka horeyseysiiso salaada duhur afar rakcadood o sune ahna ka danbeysiiso, walibana ilaashato.

قال نبي صلى الله عليه وسلم فيما رواه الترمذي وأبو داود وصحيحه الشيخ الألباني رحمه الله:
"من يحافظ على اربع ركعات قبل ظهر وبعدها حرمه الله علي النار"

"Qofka ilaaliya afar rakcadood"sune" oo ka horeeya salaada duhur iyo afar rakcadood oo ka danbeeya, ilaahey'sw' naarta ayuu ka xoreeyaa adoonkaas.", Hadii ay naftaada ku cuslaadaan waxaad xasuusisaa bushaaradan aadka uweyn,

"حرمه الله على النار"

Waad dadaali doontaa bi'idni laah "sw".

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

أيها المسلمون عباذ الله

5) ARINTA SHANAAD EE UU ILAAHEY 'SW' ADOOMADIISA NAARTA KAGA XOREYNAYO WAA:

البكاء من خشية الله تبارك وتعالي *

*** In adoonku ilaahey 'sw' dartii u ooyo, لا رياء ولا سمعة Isagoon cidna is tuseyn cidna is maqashiineyn in uu qalbigiisu khushuuco oo ilaahey'sw' dartiis u foorarsado taasina ay sabab unoqoto in raadkaasi uu soo gaadho indhihiisa, oo indhihiisu ilaahay'sw' ukhushuushaan oo ay daraadii u ooyaan.**

قال نبينا عليه صلاة والسلام فيما رواه الترمذي والنساني في سننهم (:لن يلج النار رجل بكا من خشية الله حتى يعود اللبن في الذرة ،- "

Wuxu yiri nebigeenu'scw' " naar gali maayo nin' waxa looga jeedaa qof lab iyo dhadig kuu doono ha ahaadee' ilaahey daraadii u ooyey ilaa caanuhu ay ku noqdaan candhadii laga soo lisey,- "

Taasi sow mustaxiil ma aha?

" in caanuhu ay ku noqdaan candhadii laga soo lisey, sidaa oo kale ayey mustaxiil u tahay in uu naar galo qof ilaahey daraadii u ooyey,

"ولا يجتمع غيار في سبيل الله ودخان جهنم منخزي مسلم ابدا -

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

"- Ku kulmi maayaan boodh ilaahey'sw' daraadii qofka u gaadhey oo sanka iyo meelaha kaleba ka marey iyo qiiqa naarta jahanama qof muslim ah labadiisa dul, ilaahey'sw' daraadii hadii boodhkaasi usoo gaadhey isaga oo cibaado kusii socda amaba se jihaad fii sabiililaah, ilaahey'sw' arintaa wuxu kaga badbaadinayaa dukhaanka ama qiiqa naarta jahanama."

هننا يا عباذ الله لمن صحت له دمعة من خيشة الله

Waa arin mudan in lagu hambalyeeyo adoonka ay mar uun u ansaxday hal mar ilmo in ay illaahey'sw' daraadii uga timid.

إن القلوب يا عباذ الله تغسل من الذنوب بماء العيون

Waxa qalbiyada dembiyadu madoobeeyeen ee dahaadhmey lagaga meydhaa biyahaa ilaahey'sw' daraadii indhaha uga timid.

أيها المسلمون عباذ الله

Qofka ilaahey'sw' arintan ku arsaaqo ee ilaahey'sw' daraadii u ooyey,

في عبادة، أو في مو عظة، أو في غير ذالك، من المواقف حصه الله بفضل لا يباري فيه.

cibaadada dhexdeeda ama iyadoo la waaninayo ama si kale kaleba ha ahaatee ilaahey'sw' wuxuu ku gaar yeelaa fadli cid gaadhi kartaa aaney jirin, qof sidaa yeelay mooyaan e.

FADLIGAASI WAA MAXEY ?

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Waa in uu ilaahey'sw' u hadheeyo maalinta qoraxda lasoo dhaweeyey ee,

تحت ظل عرشه يوم لا ظل إلا ظله

hadhkaa ilaahey'sw' mooyaane mid kale aanu jirin ayaa ilaahey'sw' u hadheynayaa.

YOWMUL XARSHI.

Waxa ka mida todabada uu rasuulku'scw' inoo sheegey in yowmul qiyaamaha loo hadheynayo,

رجل ذكر الله خاليا ففاضت عيناه ".رواه البخاري و مسلم "

" Qof ilaahey'sw' daraadii u ooyey isaga oo ilaahey'sw' xusaya oo indhihiisa kasoo burqatey isaga oo waliba kalidii ah oo cid uu is tusayaa aaney jirin."

Waxey taasi daliil u tahay in ilaahey'sw' daraadii uga timid.

Ilaahey'sw' in adoonku uu sidaasi yeelo aad iyo aad buu u jecel yahay.

Adoonka sidaa yeelana ilaahey'sw' marka uu jeclaado,

يخصه بنعمه وفضله.

Wuxu ilaahey'sw' ku gaar yeelayaa nicimkiisa aan la koobi karin karin iyo fadligiisa aan la tirin karin.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

قال نبينا عليه صلاة وسلام)ليس شي ء أحب إلى الله من قطرتين وأثرين، قطرة من دموع في خشية الله وقطرة دم تهراق في سبيل الله-

Wuxu yiri rasuulku'sw' " wax uu ilaahey ka jecel yahay ma jiro laba dhibcood iyo laba raad,

LABADA DHIBCOOD WA MAXEY ?

***Dhibic ilmo ah oo adoonka ilaahey'sw' daraadii uga timid.iyo**

***Dhibic dhiiga oo ilaahey'sw' daraadii looga daadshey,**

WAA MAXEY LABADA RAAD ?

وأما الأثران :فأثر في سبيل الله وأثر فريضة من فرائض الله (.رواه الترمذي في سننه -

LABADA RAAD WAA

***Raad adoonku uqaadey xaga jihaadka uu u qaadey, isaga oo ku jira jihaadka raadkaa uu adoonku dhigey.**

iyo

***Raad adoonku uu dhigey isaga oo ku sii socda gudashada faral ka mida faralada ilaahey'sw' inagu waajib yeelay hanoqoto salaad ama xajba hanoqoto e.**

Arinta noocaasi ahi waxey meydhaysaa,

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

بحور النيران

قال خالدبن معدان رحمه الله) :إن الدمعة البحور النيران(.

ilmada ilaahey'sw' daraadii uga qubataa waxey bakhtiisaa bado dhan oo naar ah.

نعوذ بالله يا عباد الله من قسوة القلوب وقحوط العيون..

أيها المسلمون عباد الله

6) ARINTA LIXAAD EE UU ILAAHEY "SW" ADOOMADIISA NAARTA KAGA XOREYNAYAA WAA

سماحة الأخلاق. *

*** In adoonku noqdo mid akhlaaq wanaagsan, dhaqan wanaagsan oo dabacsan oo saamaxaad badan oo aan raacin oo aan fulin waxey cadhadiisu u yeedhineyso oo saamaxa adoomada ilaahey'sw'..**

قال نبينا صلى الله عليه وسلم)من كان هينا لينا قريبا حرمه الله على النار (.رواه الحاكم في مستدركه وصحيحه الإمام الألباني رحمه الله

wuxu yiri rasuulku'sw' " Adoonka ah mid dabacsan o hayin ah oo u dhow adoomaha ilaahey'sw' oo aaney ka didin isaguna weheshada iyaguna weheshadaan, dhaqankaa wanaagsan sababtiisa ayuu ilaahey'sw' kaga xaaraam yeelayaa in uu galo naarta jahanama."

وهذه اخلاق النبي صلى الله عليه وسلم

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Tani waxey aheyd dhaqankii rasuulka'scw' .

Wuxu ahaa rasuulkeenu'scw' siduu ilaahey'sw' ku sifeeyeyba.

بالمؤمنين رأوف رحيم.

Hadaba adoonyahow noqo mid saamaxaad badan oo dhaafitaan badan oo dabacsan, noqo mid waji farxadi ka muuqato adoomada ilaahey'sw' ku qaabila.

Ilaahey'sw' aya naar kaaga xoreynaya e.

أيها المسلمون عباد الله

7) ARINTA TODOBAAD EE UU ILAAHEY "SW" ADOOMADIISA NAARTA KAGA XOREYNAYAA WAA

إحسان التربية البنات أو الأخوات، *

*** Waa in adoonku ilaahey'sw' ku arsaaqo hablo, kuwo ay walaalo yihiin iyo kuwa uu isagu dhaleyba ha noqdeen e.**

كراهية البناة

waxeynu ognahay in ay tahay caado jaahiliya tahay in la karaahiyeysto hablaha oo ninka marka ay gabadhi u dhalato uu ka xumaado inantaa u dhalatey.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

ومن يفعل ذالك يا عباد الله قديما وحديثا جاهل بالفضائل العديدة التي أوجب الله تبارك وتعالى لمن إبتلاه بالبناة فصبر على تربيتهن والإحسان إليهن.

Qofka hablaha karaahiyeysanayaa waa qof jaahil ka ah fadliga aadka ufaraha badan ee ilaahey'sw' u balan qaadey adoonku uu hablo ku imtixaamey.

MAXAAN U LEEYAHAY UU KU IMTIXAAMEY ?

هذا كلام النبي عليه صلاة وسلام

Ileyn tarbiyeynta habluhu waxey u baahan tahay samir, xitaa korintooda iyo quudintoodu inamada waa ka howl badan yihiin.

ولهذا قال نبينا صلى الله عليه وسلم)من إبتلاه الله بشيء من هده البنات(.

Waa fursa lidukhuuli janah in uu ilaahay'sw' hablo ku siiyo.

Waa fursad iyo wado aad ka dhigan karto mid aad janada ugu marto.

Waa mid aad naarta kaga badbaadi karto.

Si fiican indhaha ugu fur oo udhugo labadan xadith ee rasuulku'scw' uu inoogu sheegey fadliga uu helayo qofka hablaha tarbiyadeeya.

قال نبينا عليه صلاة والسلام)ليس احد من أمتي يعود ثلاث بنات او ثلاث اخواة فيحسن إليهن إلا كن له سترا من النار (.رواه البيهقي وصحيحه الإمام الالباني في صحيح الجامع

Wuxu yiri rasuulku'sw' " ma jiro axad umadeyda kamid ah,

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

من أمة الأجابة ممن أمن النبي وأتبعه

,kaas oo quudiya saddex hablood oo uu isagu dhaley ama saddex hablood oo ay walaalo yihiin oo u ixsaan fala,

أحسن بالقول والفعل

, hadii uu jiro ka noocaasi ah oo umadeyda laga dhex helo hablahaasi uu quudinayo ee uu usama falayaa waxey xijaab iyo teed uga noqdaan naarta jahanama."

يا لها من فضيله ....وهي فرصة عظيمه لمن رزقه الله سبحانه وتعالى بثلاث أخوات أو ثلاث بنات.

وقال نبينا عليه صلاة والسلام)من كان له ثلاث بنات فصبر عليهن وأطعمهن وسقاهن وكساهن من جدته كن له حجابا من النار يوم القيامة (.رواه أحمد وإبن ماجه وصحيحه المحدث الألباني رحمه الله

Wuxu yiri rasuulku scw " qofka uu ilaahay siiyo saddex hablood, saddexdaa hablood ku sabra, inamoba ilaahey ma siin, saddexdaa habloodbuu ilaahey siiyey oo uu kaga samrey nicmatul walad inuu helo, saddexdaa hablood uu quudiyey oo gaajaduu ka ilaaliyey, sadexdaa hablood wuu waraabiyey oo oonka iyo haraadka ayuu ka dhowrey, saddexdaa hablood wuxu u jarey arad beel oo aradka ayuu ka ilaaliyey, wuxa uu siinayaa waa inta awoodiisa ah ee uu helayo, oo lama odhanayo wax ka yar siiya oo cunto ah ama sharaab ah ama hu' ah, kaasi naarta xijaab uga noqon maayaan la odhan maayo, mar hadii wixii uu isagu hayey ka quudiyey hablihiisa, teed bey uga noqdaan naarta jahanama maalinta qiyaame."

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

WAA IN LAGU DADAALO U SAMO FALKA IYO WANAAJINTA HABLAHA AAD DHASHAAN AMA AAD WADA DHALATAAN.

..فلإحسان إليهن طريق الي الجنه وحجاب عن النار

اللهم إنا نسألك الجنه، ونعود بك من النار، اللهم حرم أجسادنا عن النار فإنها لا تقوى على ذالك، اللهم حرم أجسادنا عن النار فإنها لا تقوى على ذالك، اللهم حرم أجسادنا عن النار فإنها لا تقوى على ذالك، اللهم إنا نعوذ بك من عذاب القبر والنار، اللهم صلى على نبينا محمد،وعلى أل نبينا محمد، كما صليت على إبراهيم، وعلى أل إبراهيم، وبارك على نبينا محمد، وعلى أل محمد، كما باركت على إبراهيم، وعلى أل إبراهيم في العالمين إنك حميد مجيد.

خطبة الجمعة في مسجد الأنصار _حرسه الله بالعلم والعلماء.

ألقاها الشيخ الفاضل أبو عبد الرحمن عبد الله حسن حاش البر بداوي _ حفظه الله تعالى

04/07/2014-06/09/1435

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

BUUGA FADLIGA BISHA RAMADAAN

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

QALINKII CABDICASIIS XASAN AADAN GABYAAYE

TAFATIRKII QORAA AMUUN XASAN AADAM

NASHQADII DAAUUD MAXAMED XASAN CALI

WIXII TALIYO TUSAALAA KUSOO GUDBI.

FACEBOOK: QORAA CABDICASIIS GABYAAYE CG

EMAIL:

abdiasishassan42@gmail.com

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

WABILLAAHI TAWFIIQ.

DHAMAAD

ALLAA MAHAD LEH

.....END.....